GUDIGA WAXBARASHADA EE GOBALKA UTAH
XUQUUQDA WAXBARASHADA GAARKA AH EE WAALIDIINTA IYO CARUURTA

OGAYSIISKA BADQABKA HAWSHA

December 2016

ADA Compliant: 2/25/2021

Miiska Mawduucyada

Hordhac 1
Macluumaadka xiriirka 2
Ogaysiisyada Sanadlaha ah ee Waalidka/Wakiilka 3
Macluumaad Guud 5
Ogaysiis Horay Looqaray (34 CFR §300.503) 5
Luuqada Hooyo (34 CFR §300.29). 5
Mailka Korontada ah (34 CFR §300.505). 6
Ogolaanshaha Waalidka—Qeexid (34 CFR §300.9). 6
Ogolaanshaha Waalidk (34 CFR §300.9) 6
Fursadaha waalidka si Loobaaro Diiwaanada; Kaqaybgalka Waalidka ee Kulanka (34 CFR §300.501). 9
Qiimaynta Waxbarasho ee Madaxa banaan (34 CFR §300.502). 9
Badalida waalidinta (34 CFR §300.519). 11
Wareegida Xuquuqda Waalidnimo Da'da Qaangaarka (34 CFR §300.520). 11
Xaqiiqnimada Macluumaadka 13
Xaqiiqnimada macluumaadka (34 CFR §300.610). 13
Qeexitaanada (34 CFR §300.611). 13
Shaqsiyan Loo aqoonsankaro (34 CFR §300.32). 13
Ogaysiis kusocda Waalidiinta ama Ardayga Qaangaarka ah (34 CFR §300.612). 13
Xuquuqda Gaarista (34 CFR §300.613, 34 CFR §99.10). 14
Diiwaanka Gaarista (34 CFR §300.614) 14
Diiwaanada in kabadan hal arday (34 CFR §300.615). 14
Liiska Qaybaha iyo Goobaha Macluumaadka (34 CFR §300.616). 14
Qarashadaadka (34 CFR §300.617). 15
Waxkabadalida Diiwanada Markuu Waalidku codsado (34 CFR §300.618, 34 CFR §99.20). 15
Fursad Dhagaysi (34 CFR §300.619, 34 CFR §99.21). 15
Natiijada Dhagaysiga (34 CFR §300.620, 34 CFR §99.21). 15
Hab socodka Dhagaysiga (34 CFR §300.621). 16
Ogolaansho (34 CFR §300.622). 16
Badqabyo (34 CFR §300.623). 17
Baabi'inta macluumaadka (34 CFR §300.624). 17
Wareegida Xuquuqda Waalidnimo Da'da Qaangaarka (34 CFR §300.520). 18
Xuquuqda ardayga (34 CFR §300.625). 18
Hababka Cabashada ee Gobalka 19
Hababka Cabashada ee gobalka (34 CFR §300.151 and 53A-15-305). 19

Hababka Cabashada ugu yar ee Gobalka 34 CFR §300.152). 19
Gudbinta dacwad Gobaleed (34 CFR §300.153). 20
Hababka Dacwooyinka Furan 22
Gudbinta Dacwad furan (34 CFR §300.507 and 53A-15-305). 22
Dacwada Furan (34 CFR §300.508). 22
Foomamka Nooca (34 CFR §300.509). 24
Dhexdhaxaadin (34 CFR §300.506). 24
Habka Xalinta (34 CFR §300.510). 25
Dhaygaysiga Dacwadaha Furan 27
Dhagaysiga Dacwad Furan oo Dhexdhexaad ah (34 CFR §300.511). 27
Xuquuqaha dhagaysiga (34 CFR §300.512). 28
Go'aanada dhagaysiga (34 CFR §300.513). 28
Kamadanbaysnimada Go'aanka (34 CFR §300.514). 29
Hababka Fulinta ee Gobalka (34 CFR §300.537). 29
Jaan goynta waqtiga iyo Kuqancinta Dhagaysiga (34 CFR §300.515). 29
Sharciga Madaniga ah (34 CFR §300.516). 30
Qarashka Xeer ilaaliyaha (34 CFR §300.517 and 53A-15-305(7)). 30
Xaalada Ardayga Inta dacwada Socoto (34 CFR §300.518). 32
Hababka loo maro Marka La edbinaayo Ardayda Curyaamiinta ah 33
Awooda Shaqaalaha Iskuulka (34 CFR §300.530). 33
Muujinta Goaaminta (34 CFR 300.530). 34
Boosk Badalida Sababtoo ah Cayrinta Anshaxeed (34 CFR §300.536). 36
Kago'aan gaarida Dajinta (34 CFR §300.531). 36
Racfaanka uu qaato waalidka ama LEALEA (34 CFR §300.532). 36
Meelaynta Inta lagu jito Racfaanada (34 CFR §300.533). 37
Difaaca Ardayda aan wali Xaqa uyeelan Waxbarashda Gaarka ah iyo Adeegyada Kuxeeran (34 CFR §300.534). 37
Gudbinta Talaabo Lharci fulin iyo Maamulada Caldaalada (34 CFR §300.535). 38
Ardayda Naafada ah oo ay Soo qoreen Waalidkood kana qoreen Iskuul Gaar loo leeyahay marka FAPE ay arinta joogto 39
Guud (34 CFR §300.148). 39

HORDHAC

Sharciga Dadka Curyaamiinta ah (IDEA), sharciga Federalka ah ee quseeya waxbarashada ardayda naafada ah, waxuu kadoonayaa iskuulada inay siiyaan waalidiinta ardayga curyaanka ah ama ardayda qaangaarka ah ee curyaamiinta ah ogaysiis ay kuqorantahay sharaxaad buuda ee badqabyada hawl wadida ee laga heli karo IDEA iyo Waaxda qeerarka waxbarashada maraykanka. Nuqul kamida ogaysiiskaan waa in lasiiyo waalidiinta ama ardayda qaangaarka ah halmar kaliya sanad dugsiyeedka, marka lagareebo in nuqul lasiiyo waalidiinta ama ardayda qaangaarka ah: (1) xiliga qiimaynta koobaad ee gudbinta ama codsiga waalidka; (2) marka lakeeno cabashada koobaad ee gobalka iyo marka koobaad lakeeno cabashada hawsha socota ee sanad dugsiyeedka; (3) marka uu codsado waalidka ama ardayga qaangaarka ah (34 CFR §300.504(a)).

Adiga iskullkuba waxaad wadaagtaan waxbarashada ilmahaaga. Hadii adiga ama iskuulku ay arimo haystaan ama uu walaac kaqabo waxbarashada ilmahaaga, adiga iyo macalinka ilmahaagu waa inaad si furan uga doodaan arimaha. Hadaadan kuqanacsanayn doodahaan, waxaad laxariiraysaa iskuduwaha waxbarashada gaarka ah ee deeganka iskuulkaaga/iskuul gaar ah. Waxaan kugu boorinaynaa inaad si firfircoon uga qaybqaadato waxbarashada ilmahaaga.

Kawaalid ahaan iilmaha qaadanaaya adeegyada waxbarashada gaarka ah, ama xaq uyeelankara adeegyada waxbarashada gaarka ah, waxaad leedahay xuquuq gaar ah ama badqabyo hawleedka ee sharciyada federalka iyo gobalka. Xuquuqahaan waxaa lagu taxay ogaysiiskaan badqabyo hawleedka. Liiska xuquuqahaaga waa in lagugusiiyaa luuqadaada hooyo ama luuqad aad fahmi karto. Hadaad doonayso faahfaahin dheeri ah ee xuquuqahaan, fadlan laxiriir maamulaha iskuulka ilmahaaga, maamulaha iskuulka, iskuduwaha waxbarashada gaarka ah, ama Gudiga Waxbarashada Gobalka Utah ee qaybta Adeegyada Waxbarashada Gaarka ah. IWaxaa intaa sii dheer, waxaad macluumaad dheer ah kahelaysaa Gudiga Waxbarashada Gobalka Utah webseetka Adeegyada Waxbarashada Gaarka ah ee http://www.schools.utah.gov/sars.

Sharaxaadaha ee soogaabinada ogaysiiskaan kujira:

FAPE	Waxbarasho dadwayne oo toos ah oo lacag la'aan ah
IDEA	Qaybta B ee xeerka Waxbarashada shaqsiyaadka Curyaanka ah
IEP	Barnaamijka Waxbarashada Gaarka ah
LEA	Walkaalada waxbarashada maxaliga ah—41 iskuul degmo ee Utah, Iskuulada Utah ee Dhagoolka iyo Ildhoolka, iyo dhamaan iskuulada gaarka ah ee kuwaasoo kushaqeeya sharciga Gobalka kuwaasoo aan ahayn iskuulada LEA ee kujira iskuul degmeedka.
USBE SER	Xeerarka Waxbarashada Gaarka ah ee Gudiga Waxbarashada ee Gobalka Utah
USBE	Gudiga Waxbarashada ee Gobalka Utah

Erayga "maalin" waxaa looga jeedaa maalinta calendarka, hadii kale sida lasheegay.

MACLUUMAADKA XIRIIRKA

Gudiga Waxbarashada Gobalka Utah, Qaybta Adeegyada Waxbarashada Gaarka ah
250 East 500 South
P.O. Box 144200
Salt Lake City, Utah 84114-4200
801-538-7587
Sharciyada, Qeerarka Gobalka, iyo Siyaasadaha Boga
http://schools.utah.gov/sars/Laws.aspx

Xarunta Waalidka ee Utah
230 W. 200 S. Suite 1000 (Royal Wood Office Plaza)
Salt Lake City, UT 84101
801-272-1051 or 1-800-468-1160 (Toll-Free)
Webseetka Xarunta Waalidka ee Utah
http://www.utahparentcenter.org

Xarunta Sharciga ee Curyaamiinta
205 Waqooyi 400 Galbeedka
Salt Lake City, Utah 84103
1-800-662-9080 (Voice) or 1-800-550-4182 (TTY)
Xarunta Sharciga ee Curyaamiinta
http://www.disabilitylawcenter.org

Xarunta macluumaadka iyo ilaha ee Waalidka
Webseetka Xarunta Waalidka
http://www.parentcenterhub.org

OGAYSIISYADA SANADLAHA AH EE WAALIDKA/WAKIILKA

Raadinta Ilmaha

Waaxyada waxbarashada gaarka ah ee iskuulada dhamaan gobalka waxay iskudayayaan inay la xiriiraan ee da'da udhaxaysa markay dhashaan ilaa labaatan iyo koow ayagoo raacaaya sharciga ferderalka, kaasoo waajib kadhigaaya siinta adeegyo barnaamijyada waxbarashada iyo/ama adeegyada shaqsiyaadkaan oo kale. Hadii arday dhibaato muuqata ay kahaysato araga, maqalka, hadalka, habdhaqanka, uu samaynaayo hormar aad ugaabis ah kaasoo aan ahayn kii laga rabay asaagiis, uu qabo cilad jirka ah, ama caqabado kahaysta barashada, wuxuu noqonkaraa ilmo curyaan ah. Hadaad ogtahay ilmo aad isleedahay qax ayuu uleeyahay adeegyadaan, ayna kujiraan ardayda loomalaynaayo inay curyaan yihiin, inkastoo ay fasalba fasal ugasii gudbaayaan, iskuul gaar looleeyahay dhigta, aan guri lahayn, ama soogalooti ah, fadlan laxariir maamulaha iskuulkaaga ama xafiiska waxbarashada gaarka ah ee deegaanka iskuulka ee aad dagantahay.

Deeqda Waxbarashada ee Baahiyaha Gaarka ah ee Carson Smith

Deeqda waxbarasho ee Baahiyaha Gaarka ah ee Carson Smith waxay lacagta iskuulka kabixisaa ardayda uqalma ee curyaamiinta ah kuwaasoo laga diiwaan gashay iskuulada deeqdaan uqalma ee gaarka looleeyahay. Dadka doonaaya inay codasaan waxay kadaalacankaraa barnaamij la faahfaahiyay boga Webseetka Carson Smith USBE ee https://www.schools.utah.gov/sars/Quick-Links/Carson-Smith-Scholarship.aspx.

Wargalinta Xuquuqaha ee FERPA

1. Xeerka xuquuqda Waxbarashada iyo Sirta ee Qoyska (FERPA)wuxuu siinayaa waalidiinta iyo ardayda 18 jirka ah ama kawayn xuquuqo gaar ah ayadoo loofiirinaayo tayada waxbarasho ee ardayga. Xuquuqahaani waa:
2. Xaqa il ay lasocdaan oo indhaindheeyaan dadaalka waxbarasho ee ardayga 45 maalmood gudohood kadib maalinta LEA ay hesho codsiga galida.
3. Xuquuqda inaad codasato waxkabadalka diiwanada dadaalka waxbarasho ee ardayga kaasoo waalidka ama ardayga xaqa uleh uu arko inaysan saxnayn, marin habaain ay tahay, ama hadii kale ay xadgudub kutahay xuquuqda shaqsiga ah ee ardayga ee FERPA.
4. Xaqa aad uleedahay inaad qorto ogolaansho kahor intaysan LEA soobandhigin foomka macluumaadka shaqsiyan la aqoonsankaro diwaanada waxbarasho ee ardayga, marka laga reebo haday FERPA ay amarto in lasoobandhigo ayadoon ogolaansho lawaydiin.
5. Xaqa aad uleedahay inaad cabasho uqorto waaxda maraykan uqaabilsan waxbarashada taasoo qusayso eedayn ah in LEA ku kufashilantay inay buuxiso shuruudaha FERPA. Magaca iyo ciwaanka lagu diraayo cabashada waa:

   Xafiiska Siyaasada Adeecida Qoyska
   Waaxda waxbarashada maraykan
   400 Maryland Avenue, SW
   Washington, DC 20202

Wargalinta sanadlaha ah ee Adeega caafimaad ee kuxusan 34 CFR § 300.154(d)(2)(iv)

Xeerarka dhaqan galinaaya Sharciga Waxbarashada Shaqsiyaadka curyaamiinta ah (IDEA), wuxuu siinayaa waalidiinta ardayda qaxa uleh xuquuqo gaar ah ayadoo laraacaayo awooda

iskuulka degmado uleeyahay inuu wax ka ogaado caymiska gaarka ah iyo faaidooyinka guud, sida adeega caafimaad, si ay uga caawiso inay bixiso adeegyo gaar ah kuwaasoo iskuulka laga bixiyo. Xuquuqahaan waa sidaan soosocota:

1. **Waxaad xaq uleedahay inaad hesho ogaysiis kuqoran luuqad aad fahmayso.** Iskuulku waa inuu kusiiyaa ogaysiis qoran oo sanadle ah ee xuquuqdaada,, taasoo ay qasab tahay in lagu qoro luuqad dadka oo dhan fahmayaan; iyo sidoo kale lagu qoray luuqada hooyo ee waalidka ama hab kale oo wadahadal oo waalidku isticmaalo, ilaa aysan macquul ahayn mooyee.
2. Macluumaadka sirta ah ee ilmahaaga lamasoo bandhigi karo adoon ogolaan. Waa in ogolaansho waalid lagahaystaa Sharciga Xuquuqaha Waxbarasho iyo Shaqsiyeed ee Qoyska (FERPA) xeerarka kuxusan 34 CFR qaybta 99 iyo xeerarka LEA ee kuxusan §300.622 kahor intaan degmada iskuulku kudhawaaqin, sababo sheegasho, macluumaadka aqoonsiga shaqsiga ah ee ilmahaaga loo diro wakaalada masuulka ka ah maamulida barnaamijyada faaiidooyinka iyo caymisyada gobalka ee guud (tusale. Kaalmo caafimaad).
3. Ilmahaaga wuxuu qax uleeyahay waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada laxiriira adoon wax qarash ah kubixin. Tani waxay kadhigantahay, ayadoo latixgalinaayo adeegyada loobaahanyahay si loo Waxbarasho Bilaash ah oo dadwayne (TAPE) ee ilmaha uqalma ee kujira degmada iskuulka IDEA:
    a. Waxaa laga yaabaa inaan waalidiinta laga rabin inay iska qoraan ama iskadiiiwaan gashaan barnaamijyada faaiidooyinka dadwaynaha ama caymiska si ilmahooda uhelo TAPE
    b. Loogama baahna waalidinta inay bixiyaan lacago dheeri ah sida lacagaha layska goosto ama la qacagaha layska qaado marka sheegashada adeegyada ah lagudbinaaya ee quseeya qaybtaan, lakiin waxay bixanayaan qarashaadka kale ee waalidka lagarabo;
    c. Ma isticmaali kartid faaiidooyinka ilmaha ee faaiidooyinka dadwaynaha ama barnaamijka caymiska hadii taas la istimaalo waxay:
        i. Yaraynaysay caymiska ah intaad nooshahay ama faaiido kasta oo lahubo;
        ii. Waxay sababaysaa in qoyska ay bixiyaan adeegyo ay hadii kale bixinlahaayeen faaiidooyinka dad waynaha ama barnaamijka caymiska kuwaasoo ilmuhu ubaahanyahay waqtiga ilmuhu iskuulka uusan joogin;
        iii. Kordhin kartaa qarashaadka joogtada ah ama waxay joojin kartaa faaidooyinka ama caymiska; ama
        iv. Halis kutahay xaqa aad uleedahay deeqaha lasiiyo guryaha iyo bulshada, kuwaasoo kuxiran qarashaadka lagu bixiyo caafimaadka guud.
4. **Waad kanoqonkartaa ogolaanshaha xili kasta**. Markaad ogolaato shaac bixinta macluumaadka sirta ah ee ilmahaaga aadna kudhiibto wakaalada kamasuulka ah maamulka barnaamijka faaiidooyinka Gobalka ee dadwaynaha ama caymiska (tusaale. Caawinta caafimaadka), waxaad xaq sharci ah uleedahay ee FERPA inaad kabaxdo ogolaanshahaas markaad doonto.
5. Hadaad diido ogolaanshaha, ama aad kanoqoto ogolaanshaha, degmada iskuul waa inay wali kusiisaa adeegyada loo baahanyahay adoon wax qarash ah bixin. Hadaad diido inaad bixiso ogolaansho si loogu dhawaaqo macluumaadka shaqsiga ah aad siiso wakaalada masuulka uga ah gobalka maamulida barnaamijka faaiidooyinka dadwaynaha ama caymiska (tusaale. Caawimaad caafimaad), ama, hadaad ogolaansho bixiso lakiin aad hadhoow kanoqoto, taasi kama qaadayso degmada iskuulka masuuuliyadeeda ah inay xaqiijiso in dhamaan adeegyada loobaahnaa lasiiyo waalidiinta si bilaash ah.

MACLUUMAAD GUUD

OGAYSIIS HORAY LOOQARAY (34 CFR §300.503).

Ogaysiis

Ogaysiis horay looqoray waa in lasiiyaa waalidiinta ardayda curyaamiinta ah ama ardayga qaangaarka ah waqti macquul ah kahor LEA:

1. Soojeedinada in lasameeyo ama labadalo aqoonsiga, qiimaynta, ama meelaynta aqooneed ee ardayga ama siinta ardayga ee TAPE, ama
2. Diidmada in lasameeyo ama labadalo aqoonsiga, qiimaynta, ama meelaynta aqooneed ee ardayga ama siinta ardayga ee TAPE,.

Mawduuca Ogaysiiska

Ogaysiiska loo baahanyahay waa inay kujirtaa:

1. Qeexid falka ay doonayso ama diidayso LEA;
2. Sharaxaad ah sababta ay LEA udonayso ama udiidayso inay falkaan fuliso;
3. Qeexida qiimaynta hawl kasta, qiimayn, diiwaanka, ama warbixin ay LEA ay u adeegsatay aasaaska doonista ama diidmada falka;
4. War qoraal ah oo ah in waalidiinta ardayga curyaanka ah ama ardayga qaangaarka ah inay difaac kuleeyihiin badqabyo hawleedka LEA iyo, hadii ogaysiiskaan uusan ahayngudbinta koobaad ee qiimaynta, qaababka lagu helikaro nuqul ah qeexida badqabyo hawleeedka;
5. Meelaha ay waalidiinta ama ardayda qaan gaarka ah lasoo xariirikaraan si ay caawimaad ugu helaan fahamka waxyaabaha ay bixiso LEA;
6. Sababaha dookhyadaan loodiiday, iyo
7. Qeexida sababaha kale kuwaasoo laxiriira Doonista ama diidmada LEA.

Ogaysiis kuqoran luuqad lafahmi karo

Ogaysiisku waa inuu ahaado:

1. Mid lagu qoray luuqad ay dadku fahmi karaan; iyo
2. lagu bixiyo luuqada hooyo ee waalidka ama ardayga qaangaarka ah ama hababka kale ee isgaarsiin kuwaasoo waalidku ama ardayga qaangaarka ahi ismaalo, hadii aysan si cad suuragal u ahayn.

Hadii luuqada hooyo ama habka kale ee isgaarsiin ee waalidka ama ardayga qaangaarka ah ay tahay luuqad laqoro, LEA waa inay talaabooyin qaado si ay uhubiso;

1. In ogaysiiska lagu turjumo cod ahaan ama hababka kale waalidka ama ardayga qaangaarka ah ee luuqadiisa hooyo ama noocyada kale ee isgaarsiinta;
2. Waalidka ama ardayga qaangaarka ah wuxuu fahmayaa ujeedada opgaysiiska, ayna
3. Jirto cadayn qoran oo ah in shuruudihii labuuxiyay.

LUUQADA HOOYO (34 CFR §300.29).

Luuqada Hooyo, marka la adeegsado ayadoo loofiirinaayo qof aan ingiriiska si fiican u aqoon, waxay kadhigantahay kuwaan soosocda:

1. Luuqada uu qofkaasi aalaaba isticmaalo, ama, marka ardayga laga hadlaayo, luuqad uu waalidku aalaaba kuhadlo ama ardayga qaangaarkaa uu kuhadlo dhamaan xiriirada tooska ah ee ardayga, (ayna kujiraan qiimaynta ardayga), luuqada uu ardayga aalaaba guriga ku isticmaalo ama goobta waxbarashada.

2. Dadka dhagaha ama indhaha la', ama qof aan lahayn luuqad laqoro, habka isgaarsiinta waa waxa qofku markasta isticmaalo (sida luuqada ishaarada, Braille, ama isgaarsiinta hadalka ah.

MAILKA KORONTADA AH (34 CFR §300.505).

Waalidka ilmaha curyaanka ah waxay doorankaraan inay ogaysiisyada kuhelaan habka isgaarsiinta ee electronic mail ahaanta, hadii LEA dookhaas siiso.

OGOLAANSHAHA WAALIDKA—QEEXID (34 CFR §300.9).

Ogolaansho wuxuu kadhiganyahay:

1. In waalidaka ama ardayga qaangaarka ah si buuxda loogu warbixiyay dhamaan macluumaadka laxiriira hawsha ogolaanshaha, luuqadiisa hooyo ama habkale oo isgaarsiin.
2. Waalidka ama ardayga qaangaarka ah wuxuu fahmayaa aqbalayaana qoraal ahaan samaynta hawsha kujirta ogolaanshihiisa, ogolaanshuhuna wuxuu qeexayaa in shaqada iyo liiska diiwada (hadayba jiraan) kuwaasoo lasin doono ciday qusayso.
3. Waalidka ama ardayga qaangaarka wuxuu fahmayaa in ogolaansho biinta ay tahay bilaash dhanka waalidka ama ardayga qaangaarkaa lagana noqonkaro xili kasta. Hadii waalid ama arday qaan gaar ah uu kanoqdo ogolaanshaha, kanoqoshadaas lama soo celin karo (Tusaale. kama ay noqonkarto fal dhacay ogolaasha kadib iyo kahor intaan ogolaanshaha laga noqon).

Hadii waalidka ama ardayga qaan gaarka uu kanoqdo ogolaansho si qoraal ah ee heliada ardayga adeegyada waxbarashada qaaska ah iyo kuwa laxiriira, wakaalada guud lagama doonaayo inay waxkabadasho diiwanada waxbarasho ee ardsayga si meesha uga saarto wax laxiriira helida ardayga ee waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada kuxeeran ayadoo loo sababaynaayo kanoqoshada ogolaanshaha.

OGOLAANSHAHA WAALIDK (34 CFR §300.9).

Ogolaanshaha Qiimaynta Koobaad

Doonista LEA ee ah inay samayso qiimaynta koobaad si ay go'aan uga gaarto in ardaygu uqalmo inuu noqdo arday uqalma arday curyaan ah waa inay ogolaansho sharaxan kaheshaa waalidka ama ardayga qaangaarka kahor intaysan samayn qiimaynta.

Ogolaanshaha ardayga waalidkiis wado ama kan qaangaarka ah ee qiimaynta koobaad waa inaan looqaadan inay tahay ogolaanshaha koobaad ee ee bixinta waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada kuxeeran.

LEA waa inay samaysaa dadaalo macquul ah si ay ogolaansho sharaxan waalidka ama ardaga qaangaarka ah uga hesho si loo sameeyo bixinta koobaad ee waxbarasho gaar ah ama adeegyada kuxeeran ee lasiiyo ardayda xaqa uleh ee curyaamiinta ah.

Marka lasameaynaayo qiimayn cilmu nafsi ah, LEA waa inay dhaqangalisaa shuruudaha ogolaanshaha waalidka ama ardayga qaangaarka ah ee UCA 53A-13-302 (Utah FERPA). Hadii waalidka ilmuh uusan bixin ogolaansho qiimaynta koobaad ah, ama waalidku uusan kajawaabin codsiga ah inuu ogolaansho bixiyo, LEA waxay, laakiin looma baahna, inay raadiso

qiimaynta koobaad ee ilmaha ayadoo isticmaalaysa badqabyada hawsha, ayna kamid yihiin daawooyinka iyo iyo hawlaha socda.

Shuruucda Gaarka ah ee Qiimaynta Koobaad ee Xaafadaha Gobalka

Kaliya qiimaynta koobaad, hadii ardaygu joogo xaafad gobalka ah uuna la daganayn waalidka ardayga, LEA lama rabo inay ogolaansho faahfaahsan kahesho waalidka, hadii:

1. Marka laga tago dadaalada macquulka ah, LEA ma ogaankarto meesha ay waalidka inmaha jiraan; ama
2. Xuquuqda waalidka ardayga waxaa laguusoo afjarayaa ayadoo loofiirinaayo sharciga gobalka; ama
3. Xuquuqda waalidka ee samaynta go'aano waxbarashada ah waxaa kaqaadaaya xaakimka asagoo laraacaayo sharciga gobalka ogolaanshaha qiimaynta koobaadna waxaa bixinaaya qof uu xaakimku magacaabay si u ardayga umatalo.

Ogolaanshaha waalidka ee Adeegyada

LEA waxay masuul katahay inay udiyaariso TAPE ardayga curyaanka ah waa inay ogolaansho faahfaahsan kaheshaa waalidka ardayga ama ardayga qaangaarka ah kahor bixinta koobaad ee waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada kuxeeran ee ardayga.

LEA waa inay samaysaa dadaalo macquul ah si ay ogolaansho sharaxan waalidka ama ardaga qaangaarka ah uga hesho si loo sameeyo bixinta koobaad ee waxbarasho gaar ah ama adeegyada kuxeeran ee lasiiyo ardayda xaqa uleh ee curyaamiinta ah.

1. Hadii waalidka ardayga ama ardayga qaan gaarka ah uu kuguuldaraysto kajawaabida codsiga, ama uu diido inuu ogolaado bixinta koobaad ee waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada kuxeeran, LEA ma adeegsankarto geedi socodyada ee kujira qaybta IV ee USBE SER ayna kujiraan hawlaha dhexdheaxaadinta ama hawlaha socda, si loo helo heshiis ama xeer kuwaasoo argayga siinaaya in lasiiyo adeegyada.
2. Looma arkaayo inay shuruudaha kuxad gudbayso si loogu fasaxo ardayga TAPE kuguuldaraysiga in ardayga lasiiyo waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada kuxeeran taaso LEAQ ay ogolaansho uwaydiisanayso; mana
3. Loo baahna in ay kuqanciso kulanka kooxda IEP ama ay aad IEP usamayso ardayga adeegiisa waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada kuxeeran taasoo LEA ay ogolaanshaha noocaan udalbanayso.

Hadii waqti kasta oo kuxiga bixinta koobaad ee waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada kuxeeran, waalidka ardayga ama ardayga qaangaarka ah uu kanoqdo qoraal ahaan ogolaanshaha sii wadida bixinta waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada kuxeeran, LEA

1. Masii wadi karto biinta waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada kuxeeran ee ardayga, laakiin waa inay qortaa ogaysiis hore ayadoo loofiirinaayo qaybta IV.D ee USBE SER kahor intaysan joojin bixinta waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada kuxeeran:
2. Ma isticmaali karto hab socodka kujira qaybta IV ee USBE SER ayna kamid tahay hawlaha dhexdhaxaadinta ama hawlaha socda, si loohelo heshiis ama xeer ah in ardayga lasiiyo adeegyada:
3. Looma arkaayo inay shuruudaha kuxad gudbayso si loogu fasaxo ardayga TAPE kuguuldaraysiga in ardayga lasiiyo waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada kuxeeran taaso LEA ay ogolaansho uwaydiisanayso; mana
4. Loo baahna in ay kuqanciso kulanka kooxda IEP ama ay aad IEP usamayso ardayga adeegiisa waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada kuxeeran taasoo LEA ay ogolaanshaha noocaan udalbanayso (§300.300).

LEA ma isticmaalayso diidmada waalidka ogolaanshaha hal adeeg ama hal shaqo inay ugu diido waalidka ama ardayga helida adeeg kale, faaiido, ama shaqooyinka LEA ama ay kuguuldaraysato inay ardayga siiso TAPE

Ogolaanshaha waalidka ee Dib uqiimaynta

LEA kasta waa inay heshaa ogolaansho faahfaahsan ee waalidka ama ardayga qaangaarka ah kahor intaan lasamayn dib uqiimaynta ardayga curyaanka ah.

Hadii waalidka ama ardayga qaangaarka uudiido inuu bixiyo ogolaanshaha dib uqiimaynta, LEA waxay, laakiin qasab maaha, dalbal kartaa dib uqiimaynta ayadoo adeegsanaysa xalinta muranka ogolaanshaha ee hababka lagu bixiyo Badqabyada Hawlaha, ayna kamidyihiin hababka dhexdhexaadinta ama hawlaha socda.

LEA kuma xadgudbayso uhogaansankeeda xeerka ilaalinta ilmaha haday qaadacdo inay dalbato dib uqiimaynta.

Ogolaanshaha faahfaahsan ee waalidka ama ardayga qaangaarka ah looma baahno in lahelo hadii LEA ay arintaas xalinkarto:

1. Waxay samaysay dadaalo macquul ah si ay uhesho ogolaanshahaan,
2. Waalidka ardayga ama ardayga qaan gaarka ahina ay kuguuldaraysteen inay jawaab bixiyo.

Dukuumintiyaynta Dadaalada Macquulka ah si Loohelo Ogolaanshaha Waalidka

Si loo buuxsho dadaalada macquulka ah si loohelo ogolaansho faahfaahsan ee waalidka ama ardayga qaangaarka ah, dadaaladaas waa in ladukuminti gareeyaa waxaana kujiri kara diiwaanada faahfaahsan ee wicitaanada lasameeyay ama la iskudayay iyo natiijooyinka wicitaanadaas, nuqulada fariimaha loo diray aalidka ama ardayga qaangaarka iyo jawaabaha lahelay, iyo diiwaanka booqashooyinkii lagu tagay guriga ama koobta shaqada ee waalidka ama ardayga qaangaarka iyo natiijooyinka booqoshooyinkaas.

Shuruudaha Kale ee Ogolaanshaha

Ogolaanshaha waalidka ama ardayga qaangaarka ah looma baahna kahor:

1. Fiirinta macluumaad horay uyaalay ka qayb ahaan qiimayn ama dib uqiimayn; ama
2. Amrida tijaabo ama qiimayn kale taasoo la amray dhamaan ardayda, marka laga reebo, kahor intaan tijaabada ama qiimaynta la amrin, ogolaansho ayaa loogu baahanyahay dhamaan ardayda.

Hadi waalidka ardayga ama ardayga qaangaarka ah kaasoo guriga waxlagu baro ama lagaliyay iskuul gaar loo leeyahay ayna galiyeen waalidkiis ama ardaygu uu qaan gaar uuyahay jeebkoodana iska dabaraan ma siinayso ogolaansho qimaynta koobaad ama dib uqiimaynta, ama waalidka ama ardayga qaangaarka ahi uu kufashilmo inuu kajawaabo codsiga bixinta ogolaansho, LEA ma istimaali karto Badqabyo hawleedka, ayna kamid yihiin dhexdhexaadinta iyo hawlaha socda, LEA na lagama rabo inay arday u aqoonsato mid xaq uleh waxbarashada gaarka ama adeegyada kuxeeran.

FURSADAHA WAALIDKA SI LOOBAARO DIIWAANADA; KAQAYBGALKA WAALIDKA EE KULANKA (34 CFR §300.501).

Waalidka ardayga curyaanka ah ama qaangaarka waa inuu awoodaa, ayadoo laraacaayo xeerarka gobalka, fursad uu ku eego uuna kubaaro dhamaan diiwaanada waxbarashada ee laxiriira aqoonsiga, qiimaynta, iyo meelaynta ardayga, iyo siinta TAPE ardayga.

Waalidka ardayga curyaanka ah ama qaangaarka waa inuu awoodaa fursad uu uga qaybqaato kulamada laxiriira aqoonsiga, qiimaynta, iyo meelaynta ardayga, iyo siinta TAPE ardayga. LEA kasta waa inay bixisaa ogaysiis, kaasoo ay kujiraan xeerarka gobalka, si loohubiyo in waalidiinta ardayda curyaamiinta ah ama ardayda qaankaarka ah ay helaan fursad ay uga qayb qaataan kulamada.

Kulan kuma jiraan wadasheekaysiyada caadiga ah ama aan jadwalka lahayn ee quseeya shaqaalaha LEA iyo wadasheekaysiyada iyo arimaha sida barida habka, qorshayaasha casharka, ama iskuxirka adeeg bixinta. Kulanka sidoo kale kumajirto hawlaha diyaarinta kuwaasoo shaqaalaha LEA ay wadaan si loogu sameeyo qorshe ama jawaab waalidka ama ardayga qaangaarka ah qorshohooda kuwaasoo looga doodi doono kulan danbe.

LEA kasta waa iinay xaqiijisaa waalidka arday kasta oo curyaan ah ama ardayga qaangaarku uu xubin kayahay koox kasta oo go'aan kagaarita meelaynta waxbarasho ee ardayga waalidka, ayna kujiraan wargalinta waalidka ardayga ama ardayga qaangaarka xili hore oo kufilan si loo xaqiijiyo inay fursad ay uga qaygalaan helaan iyo jadwalaynta kulanka meesha iyo waqtigaba lagu heshiiyay.

Ogaysiiska kulanka waa inuu muujiyaa ujeedada, waqtiga, goobta kulana iyo cida kaqayb galaysa wuuna wargaliyaa waalidka ama ardayga qaangaarka xaqa ay uleeyihiin inay keenaan ciday isleeyihiin aqoon ayay uleedahay ama khibrad gaar ah uleh ardayga (§300.322(b)).

Hadii midkoodna waalidka ama ardayga qaangaarkaa hiba kaqayb gali karin kulanka kaasoo go'aanka lagu gaaraayo quseeyana meelaynta waxbarashada ilmahooda, LEA waa inay adeegsataa hababkale si ay uxaqiijiso inay kasoo qayb galaan, ayna kamid yihiin shaqsiyaad ama shir taleefanka ah, ama shir muuqaal ah.

Go'aanka meelaynta waxaa gaari kara koox ayadoon waalidka ama ardayga qaangaarka uusan kaqayb qaadan hadii LEA aysan awoodin anay hesho kaqayb qaadashada waalidka ama ardayga qaangaarka go'aan gaarida. Saan markay tahay, LEA way inay haysataa diiwanada isku dayadeeda si ay uhubiso inay kasoo qayb galaan:

QIIMAYNTA WAXBARASHO EE MADAXA BANAAN (34 CFR §300.502).

Qeexitaano

Qiimaynta waxbarasho ee madaxa banaan (IEE) waxaa looga jeedaa qiimayn uusameeyay baare khibrad luleh kaasoo LEA aan ushaqayn masuul ka ah waxbarashada ardayga.

Qarashaadka dadwaynaha waxaa laga wadaa in LEA ama ay bixiso qarashka qiimaynta oo dhan ama ay xaqiijiso in qiimaynta hadii kale lagu siisay waalidka si bilaash ah.

Xuquuqda Qiimaynta ee Qarasha Dadwaynaha

Waalidka ardayga curyaanka ama ardayga qaan gaarka wuxuu xaq uleeyahay inuu helo qiimayn waxbarasho oo madax banaan oo ardaygu leeyahay lagana bixinaayo qarashaka dadwaynaha haday diidaan qiimaynta ay LEA samayso.

LEA waa inay siisaa waalidiinta ama ardayga qaangaarka ah, markay codsadaan qiimayn waxbarasho oo madax banaan, macluumaadka halka qiimaynta waxbarasho ee madaxa banaan lagu samaynaayo, iyo shuruudadaha LEA ee qiimaynada waxbarasho ee madaxa banaan.

Hadii waalid ama arday qaangaar ahi uu codsado qiimayn waxbarasho madax banaan oo lagu qarash gareeyo lacagta dadwaynaha, LEA waa inay, ayadoo dib udhac muhiim ahayn samayn, ama ay dalbato cabasho furan si ay ucodsato dhagaysi ah in qiimaynteedu ay tahay mid sax ah, ama ay xaqiijiso in qiimayn waxbarasho oo madax banaan lagu bixiyo qarashaka dadwaynaha, hadii aysan LEA muujin dhagaysiga dhed=xdiisa in qiimaynta waalidka ama ardayga qaangaarka ahi layimid aysan waafaqsanayn shuruudaha LEA.

Hadii LEA ay dalbato ogaysiis cabasho furan si loodhagaysto go'aanka udanbeeyana noqdo in LEA qiimayntedu ay sax tahay, waalidka ama ardayga qaan gaarka ah waxay wali xaq uleeyihiin qiimaynta waxbarasho ee madaxa banaan, lakiin lagama bixinaayo qarashka dadwaynaha.

Hadii waalid ama arday qaangaar ah uu codasdo qiimaynta waxbarasho ee madaxa banaan, LEA waxay waydiin kartaa sababta waalidka ama ardayga qaan gaarka ahi uu udiiday qiimaynta guud. Sikastooy tahayba, sharaxaada uu waalidku ama ardayga qaangaarka ah bixiyo looma baahna, LEA na ma dib dhigi karto sabab la'aan bixinta qiimayn waxbarasho oo madax banaan qarashkeeduna yahay kan dadwaynaha ama codsado dhagaysi furan si ay udifaacdo qiimaynta guud.

Waalid ama ardayga qaangaarka ah waaa loo ogolyahay halmar qiimayn waxbarasho oo madax nbanaan qarashkana dawladu bixiso markasta oo LEA ay qabato qiimayn uu waalidku ama ardayga qaankaarka ahu uu diido.

Qiimaynada Waalidku u abuuro

Hadii waalidka ama ardaygu uu helo qiimayn waxbarasho oo madax banaan oo qarashka dawlada laga baxsho ama uu lawadaago LEA qiimayn uu lacagtiisa iska baxshay, natiijada qiimaynta waa inay LEA aqoonsato haday waafaqdo shuruudaha LEA, go'aan kasta oo sameeyo ayadoo loo fiirinaayo siinta TAPEn ardayga, ama uu soo gudbin karo midkoodna dhagaysiga cabashada furan ee laxiriirta ardayga.

Codsiyada Qimaynada aysameeyaan Saraakiisha Dhagaysiga

Hadii sarkaal dhagaysi uuu codsado qiimayn waxbarasho oo madax banaan kaqayb ahaan dhagaysiga cabashada furan, qarashaka waa im laga bixiyaa lacagta dawlada.

Shuruudaha LEA

Hadii qiimayn waxbarasho oo madax banaan oo qarashka dawlada laga bixinaayo, shuruuda qiimaynta lagu helaayo, ayna kamidyihiin goobta qiimaynta iyo iyo aqoonta qiimeeyaha, waa inay lamid tahay shuruuda ay LEA adeegsato markay qiimaynta samaynayso, waxaana shuruudahaas kamida xuquuqda waalidka ama ardayga qaan gaarka ah uleeyahay qiimayn

waxbarasho oo madax banaan. LEA waa inay keentaa shuruudo dheeri ah waqtiyada laxiriira helida qiimayn waxbarasho oo oo madax banaan dawladuna qarashka bixinayso.

Qiimayn waxbarasho oo madax banaan oo lagu sameeyay ayadoo qarashka dawladu ay bixnayso waxay noqonaysaa hanti ay gabi ahaanba leedahay LEA.

BADALIDA WAALIDINTA (34 CFR §300.519).

LEA kasta waa inay xaqiijisaa xuquuqda ardayga in la ilaaliyo marka aan wax waalid ah loo aqoonsan ardayga aan qaangaarin; LEA kadib dadaalo macquul ah, maheli karto waalidka ardayga ayadoo laraacaayo xeerka da'da aanqaangaarin; wardaygu wuxuu daganyahay xaafad gobalka kutaala ayadoo laraacaayo xeerarka gobalka; ama ardaygu uu yahay dhalinyaro aad cidna haysan oo guri lahayn oona qaan gaarin.

\Waajibaadka LEA waxaa kamida samaynta qof booska waalidka buuxiya ardayda aan qaan gaarin. Waajibaadka LEA waxaa kamida habka go'aansiga hadii ardayga aan qaan gaarin ubaahanyahay qof waalid unoqdo si qof waalid unoqda loogu sameeyo.

Hadii ardaygu daganyahay xaafad gobalka ah, waalid macmal ah ayuu magacaabi karaa xaakimka arintiisa gacanta kuhaya, ayadoo lahubinaayo in waalidka macmalka ah uu shuruudaha buuxiyo.

LEA waay kudoorankartaa waalid macmal ah sifa kasta oo sharciga Gobalku ogolyahay. LEA waa inay xaqiijisaa in qofka waalidka macmalka ah loo doortay

1. Inuusan ahayn shaqaale USBE, LEA ama wakaalad kale oo kasta taasoo kuleg leh waxbarashada ama xanaanayta ardayga;
2. Waa inuusan lahayn dan gaar ah ama shaqo taaso kuxadgudbaysa danaha ardayga uu matalaayo;
3. Uu leeyahay aqoon iyo xirfado tasoo kufilan inuu ardayga matalo.

Qofka uqalma inuu waalid macmal ah unoqdo ardayga uma shaqeeyo LEA gabi ahaanba waayo waxaa qarash lagu siinayaa inuu ardayga matalo.

Hadii ardaygu yahay dhalinyaro cadna haysan oon guri lahayn, Shaqaale sax ah oo guriyaynta degdega ah, guriyaynta kumeel gaarka ah, barnaamijyada noolaanta madaxa banaan, iyo barnaamijyada gaarista wadooyinka ayaa loo magacaabi karaa inuu si kumeel gaar ah usii matalo ardayga, ilaa waalid macmal ah oo shuruudahoo dhan buuxinkara laga magacaabaayo.

Waalidka macmalka ah wuxuu ardayga kumatali karaa dhamaan waxyaabaha kuxeeran aqoonsigiisa, qiimaynta, iyo meelayntiisa aqooneed, iyo siinta TAPE ka ee ardayga.

Shaqaalaha USBE iyo LEA waa inay sameeyaan dadaalo macquul ah si ay uxaqiijiyaan magacaabida waalid macmal ah wax aan kabadnaun 30 maalmood kadib marka LEA ay go'aansato in ardaygu waalid macmal ah ubaahanyahay.

WAREEGIDA XUQUUQDA WAALIDNIMO DA'DA QAANGAARKA (34 CFR §300.520).

Marka arday curyaan ah uu gaaro da'da qaan gaarnimada ee sharciga Gobalka (tusale. da'da 18) tasoo ardada dhan qusayysa (marka laga reebo ardayga curyaanka ah kaasoo la

go'aanshay inuusan waafaayn xeerka Gbalka) ama ardayga curyaanka ah uu guursado ama uu noqdo mid xor ah:

1. LEA waa inay bixisaa ogaysiis kasta oo IDEA ay ubaahantahay ee waalidiinta iyo shaqsiga intaba;
2. Iyo dhamaan xuquuqda ay leeyihiin waalidiinta ee badalida ardayga ee IDEA;
3. Dhamaan xuquuqda waalidiinta ee badalida ardayga ee IDEA kaasoo loo aqoonsaday qaangaar ama caruur, xeerka sixitaanka ee Gobalka ama maxaliga ah;
4. Markasta oo xuquuqaha badalida ee Gobalku, LEA waa inay ogaysiisaa shaqsiga iyo waalidiinta badalida xuquuqaha waqti macquul ah gudihiis.

XAQIIQNIMADA MACLUUMAADKA

XAQIIQNIMADA MACLUUMAADKA (34 CFR §300.610).

Shaqaalaha USBE iyo LEA waxay samaynayaan talaabooyin si loo xaqiijiyo ilaalinta xaqiiqnimada macluumaad aqoonsiyeed kasta oo shaqsi ah, macluumaad, iyo diiwanada ay soo aruurisay ama hayso shaqaalaha USBE iyo LEA waafaqsan IDEA.

QEEXITAANADA (34 CFR §300.611).

Burburada waxaa laga wadaa burbrinta buuqata ama kasaarida aqoonsi bixiyaasha shaqsiga ah laga saaro waxbixinta sidaas awgeed waxbixinta masii ahaanayso mid qof muujinaysa.

Diiwaanada waxbarasho waxaa laga waadaa nooc diiwaano ah oo kujira qeexida ah "diiwaanada waxbarashada" ee kjirta 34 CFR §99, shuruucda dhaqalinta ee Sharciga Xuquuqaha iyo siraha qoyska ee 1974, 20 USC §1232g (FERPA).

Wakaalada kaqayb galaysa waxaa looga jeedaa wakaalad kasta ama xarun kasta taasoo aruurisa, ilaalisa, ama isticmaasha warbixin aqoonsi shaqsiyeed leh, ama macluumaadkaba lagasoo qaatay, ayadoo laraacaayo IDEA.

SHAQSIYAN LOO AQOONSANKARO (34 CFR §300.32).

Waxbixinta Shaqsiyan La aqoonsankaro waxaa laga wadaa waxbixinta taaso ay tahay in si amaan ah loo ilaalsho ayna kamid tahay:

1. Magaca ardayga, waalidka ardayga, ama xubin kale oo waalidka kamid ah.
2. Ciwaanka ardayga.
3. Aqoonsiga shaqsiga ah, sida nambarka kaarka amaanka ee ardayga ama nambarka ardayga
4. Liiska dabeecadaha shaqsiga ah ama macluumaadka kale taasoo kadhigaysa macquul in la aqoonsado ardayga qaab macquul ah.

OGAYSIIS KUSOCDA WAALIDIINTA AMA ARDAYGA QAANGAARKA AH (34 CFR §300.612).

USBE iyo LEA waa inay bixiyaan ogaysiis kaasoo kufilan inuu si buuxda ugu waramo waalidiinta ama ardayda qaangaarka ah, ayna kamidyihiin:

1. Qeexida in ogaysiiska lagu bixiyay luuqadahooda hooyo ee mujtamacyada kala duwan ee gobalka;
2. Qeexida ardayda kuwaasoo macluumaadka aqoonsi laga hayo, macluumaadka laga hayo, hababka ay USBE doonayso inay isticmaasho si ay macluumaadka u aruuriso, (ayna kamid yihiin ilaha macluumaadka laga helay), iyo waxyaabaha macluumaadka loo isticmaalaayo;
3. Sharaxaad kooban ee siyaasadaha iyo hababa ay LEA tahay inay raacdo oo quseeya kaydinta, ubandhigida qolo sadexaad, haynta, iyo baabi'inta macluumaadka aqoonsiga shaqsi; iyo
4. Qeexida ee dhamaan xuquuqaha waalidka iyo ardayda ee quseeya macluumaadkaan, ayna kujiraan xuquuqaha kujira FERPA.

Kahor aqoonsi kasta oo wayn, goob, ama shaqo qiimayn ah, ogaysiiska waa in algu soo qoraa ama looga dhawaaqaa wayrgaysyada ama saxaafada kale, ama labadaba, oo leh wareeg kufilan in waalidka ama ardayda qaan gaarka ah lagu wargaliyo ee gobalkoo dhan iyo iyo LEA yooyinka shaqada.

XUQUUQDA GAARISTA (34 CFR §300.613, 34 CFR §99.10).

LEA kasta waa inay waalidka u ogolaataa ama ardayga u ogolaataa inay kormeeraan shaqaalaha ayna arkaan diwaano kasta oo waxbarasho kuwaasoo quseeya ardaygooda lagana aruurshay, ilaalshay, ama LEA ay isticmaashay. LEA waa inay raacdaa codsiga ayadoon maalaayacni udib dhigin iyo kahor kulan kkasta oo quseeya IEP, ama kulan dhagaysi ama xalin, aana kabadnayn 45 maalmood kadib markii codsiga lasameeyay.

Xuquuqda ah inay kormeeraan ayna arkaan diiwaanada waxbarasho ee qaybtaan kujira waxaa kamida:

1. Xaqa loogu leeyahay in LEA ay kajawaabto codsiyada macquulka ah ee ah inay sharaxaado kabixiso ayna gudbiso diiwaanada.
2. Xaqa loogu leeyahay in LEA ay bixiso nuqulo diwaano ah kana kooban macluumaadka hadii lagu fashilmo in labixiyo nuquladaas waxay ka hor istaagayaan waalidka ama ardayga qaan gaarka ah inuu kormeero ama arko diiwaanada; iyo
3. Xaqa ah inaad leedahay qof matala waalidka ama ardayga qaan gaarka inuu kormeero ama arko diiwanada.

LEA waxay uqaadankartaa in waalidka ama ardayga qaangaarka ahi uu awood uleeyahay inuu kormeero uuna arko diiwaanada laxiriira ardaygiisa ilaa LEA lagula taliyo in waalidku uusan haysan awood uu ssinaayo sharciga gobalka kaasoo arimaas umaamulaaya ka wakiil ahaansho, kala tag, iyo furniin.

DIIWAANKA GAARISTA (34 CFR §300.614).

LEA kasta waa inay haysataa diiwaanka qaybaha helaaya ogolaanshaha galida ee diiwanada lasoo aruurshay, la ilaalshay, ama loo adeegsaday xeerarka waxbarashada gaarka ah ee IDEA iyo USBE (marka laga reebo galitaanka waalidka ama ardayda qaangaarka ah ama shaqaalaha fasaxa uqaba ee LEA), ayna kamid yihiin magaca qaybta, taariikhda galitaanka loo fasaxay, iyo sababta qaybta loogu fsaxay inuu u adeegsado diiwaanada.

DIIWAANADA IN KABADAN HAL ARDAY (34 CFR §300.615).

Hadii wax diiwaan waxbarasho uu kujiro macluumaadka ee wax kabadan hal arday, waalidiinta ardaydaas ama ardayda qaangaarka ah waxay xaq uleeyihiin inay kormeeraan macluumaadka laxiriira ardaygooda ama lagu wargaliyay macluumaadkaas gaarka ah.

LIISKA QAYBAHA IYO GOOBAHA MACLUUMAADKA (34 CFR §300.616).

Markii lacodsado, LEA waa inay siisaa waalidiinta ama ardayda qaan gaarka ah liiska noocyada iyo goobaha ee diiwaanada waxbarashada ee la aruurshay, la ilaalshay, ama LEA ay isticmaashay.

QARASHADAADKA (34 CFR §300.617).

Shaqaalaha USBE iyo LEA kasta waxay qarash saari karaan nuqulada diiwaanada kuwaasoo loo sameeyay waalidiinta ama ardayda ee kuira IDEA hadii uusan qarashu si muuqata uga hor istaagayn walidiinta ama ardada qaan gaarka ah inay sameeyaan xaqooda ah inay kormeeraan ayna arkaan diiwaanadaan.

Shaqaalaha USBE iyo LEA ma saari karaan qarash si ay ubaaraan ama ugasoo qaataan macluumaad IDEA.

WAXKABADALIDA DIIWANADA MARKUU WAALIDKU CODSADO (34 CFR §300.618, 34 CFR §99.20).

Waalid ama arday kaasoo qaba in macluumaadka kujira diiwaanka waxbarashada lasoo aruurshay, la ilaalshay, ama loo isticmaalay IDEA ama USBE xeerarka waxbarashada gaarka ah ay yihiin uwo aan sax ahayn ama wax marin habaabinaaya ama kuxadgudbaaya arimaha shaqsiga ah ama xuquuqaha kale ee ardayga waxay waydiisan karaan LEA taasoo macluumaadka gacanta kuhaysa inay wax kabadasho.

LEA waa inay go'aan kagaartaa hadii macluumaadka wax laga badalaayo aydoo laraacaayo codsiga waqti macquul ah gudihiis ee marka lahelay codsiga.

Hadii lea ay go'aamiso inay diido wax kabadalida macluumaadka ayadoo loofiirinaayocodsiga, waa inay ku wargalisaa waalidka ama ardayga qaan gaarka ah diidmada ayna usheegtaa walidka ama ardayga qaan gaarka ah xaqa uu uleyahay dhagaysiga arinta.

FURSAD DHAGAYSI (34 CFR §300.619, 34 CFR §99.21).

LEA waa inay, hadii lacodsado, bixisaa fursad dhagaysi si ay ula dagalanto macluumaadka kujira diiwanada waxbarashada si loo xaqiijiyo in aysan qalad ahayn, wax marin habaabinayn, ama hadii kale kuxadgudbayn arimaha shaqsiga ah ama xuquuqaha kale ee ardayga. Dhagaysigaan ma ahan cabasho/dhagaysi furan ee IDEA.

NATIIJADA DHAGAYSIGA (34 CFR §300.620, 34 CFR §99.21).

Hadii natiijada dhagaysiga awgeed, LEA waxay go'aansanaysaa in macluumaadka uusan sax ahayn, wax marin habaabinaaya, ama hadii kale kuxad gudbaaya arimaha shaqsiga ah ama xuquuqaha kale ee ardayga, waa inay macluumaadka wax uga badashaa sida larabay ayna markaa wargalisaa waalidka ama ardayga qaangaarka qoraal ahaan.

Hadii, natiijada dhagaysiga awgeed, LEA ay go'aamiso in macluumaadka uusan qalad ahan, waxna marin habaabinayn, ama hadii kale kuxad gudbayn arimaha shaqsiga ah ama xuquuqaha kale ee ardayga, waa inay wargalisaa waalidka ama ardayga qaan gaarka xaqa uu uleeyahay in galiso diiwanka ay hayso ee ardayga qoraal kawaramaaya macluumaadka ama sheegaaya sabab kasta oo uu kuqeexaayo diidmada go'aanka LEA.

Sharaxaad kasta oo lagaliyo diiwaanada ardayga ee qaybtaan waa in ay:

1. ILaalisaa LEA kaqayb ahaan diiwaanada ardayga maadaama diiwaanka ama qaybta ay ilaalisay LEA; iyo

2. Hadii diiwaanada ama qaybta tartanka ay usoo bandhigto LEA qofkasta, sharaxaadana waa in loosoo bandhiga qofka.

HAB SOCODKA DHAGAYSIGA (34 CFR §300.621).

Dhagaysi taasoo kahor imaanaysa diiwaanada waxbarashada waa in lasameeyaa hab socod yada kujira 34 CFR §99.22 sida hoos lagu qeexay. Inta ygu yar, habsocodyada dhagaysiga ee LEA waa inay raacaan shuruudaha soo socda:

1. Dhagaysiga waxaa laqabanayaa waqti macquul ah kadib markay LEA codsiga hesho, waalidka ardayga ama ardayga qaan gaarka ahina waxaa lasiinaayaa ogaysiiska waqtiga, goobta, iyo xiliga dhagaysiga uu sii soconaayo.
2. Dhagaysiga waxaa samayn kara cid kasta, uuna kujiro sarkaalka LEA kaasoo aan dano gaar ah kalahayn natiijada dhagaysiga.
3. Waalidka ardayga ama ardayga qaan gaarka waa in lasiiyaa fursad buuxda oo cadaalada si uu usoo gudbiyo cadaymo laxiriira arinta lays kuhayo waana la caawin karaa ama qofkale ayaa matali kara oo asagu doortay qarashkana asagaa iska bixinaaya, uuna kujiro xeer ilaaliye.
4. LEA waxay smaynaysa go'aan keeda qoraal ahaan waqti macquul ah gudihiis marka dhagaysigu soo dhamaado.
5. Go'aanka LEA waa inuu kusalaysan yahay cadaynta laga sheegay dhagaysiga, waana inuu kujiraa faahfaahin gaaban cadaynta ah iyo sababha go'aanka loo gaaray.

OGOLAANSHO (34 CFR §300.622).

Marka laga reebo bandhigida ciwaanka ee gudbinta iyo falka sharciga iyo awaamiirta maxkamada taasoo ogolaansho waalid aan loo baahnayn uusan ubaahnayn 34 CFR §99, ogolaansho waalid ama arday qaangaar ah waa in lahelaa kahor intaan macluumaadka aqoonsiga shaqsigaa loosoo bandhigin qofna oo aan ka ahayn saraakiisha wakaaladha kaqayb galaaya aruurinaaya ama isticmaalaaya macluumaadka ayadoo laraacaayo xeerarka waxbarasho ee IDEA iyo USBE, ama loo adeegsado ujeedo aan ka ahayn buuxinta shuruudaha xeerarka waxbarashada gaarka ah IDEA ama USBE.

LEA masiidayn karto macluumaad ka yimaado diiwaanada waxbarashada ayna usiidayso walkaaladha kaqayb galaaya ayadoo lahelin ogolaanshaha waalidka ama ardayga qaan gaarka ah ilaa uu sidaas amro xeerka 4 CFR §99.31 iyo §99.34 (FERPA):

1. Sharciga 34 CFR §99.31 wuxuu ufasaxayaa LEA inay usoo bandhigto macluumaadka aqoonsiga shaqsiga ah ee diiwaanada waxbarashada ee ardayga ayadoon ogolaansho kahaysan waalidka ama ardayga qaan gaarka ah hadii bandhigu uu yahay:
    a. Saraakiisha iskuulada kale, ayna kujiraan macalimiinta LEA kuwaasoo LEA ay ugo'aamisay inay dano waxbarasho oo sharci ah leeyihiin.
    b. Saraakiisha iskuu kale ama goob kale oo waxbarasho taasoo ardaygu uu rabo inuu iska qoro, waafaqsana shuruudaha loo dajiyay ee 34 CFR §99.34, hoos.
2. Xeerka 34 CFR §99.34 wuxuu kadoonayaa LEA gudbinta diiwaanada waxbarahsda ardayga ee raaadinaaya 34 CFR §99.34 ee kore waa inay samaysaa iskuday macquul ah si loo wargaliyo waalidka ardayga ama ardayga qaan gaarka ah ee badalida diiwaanada ciwaankii ugu danbeeyay ee lagu ogaa waalidka ama ardayga qaangaarka ah, marka laga reebo inaysan LEA haysan inay ogaysiis dheeri ah kabixisao diiwaanada badalka marka:
    a. Badalka uu keenay waalidka ama ardayga qa gaarka ah LEA da uu kabaxaayo.

b. LEA waxay kudaraysaa ogaysiiskeeda sanad laha ah ee badqabyo hawleedka, taasi waa siyaasada LEA ee ay kugudbiso diiwaanada waxbarasho ee ardayga marka uu codsado iskuulka uu ardaygu doonaayo inuu kubiiro.

LEA markay hesho macluumaad aqoonsi shaqsiyeed kayimid xarun kale oo waxbarasho ama machad way sii bandhigi kartaa macluumaadka ayadoo kawakiila LEA ayadoon ogolaansho qoran laga helin waalidka ama ardayga qaan gaarka ah hadii shuruudaha 34 CFR §99.31 iyo §99.34 ee kor kuxusan labuuxiyo, ama hadi wakaalada waxbarashada ay kuwargaliso qolada macluumaadkaan loosoobandhigaayo shuruudahaan.

Hadi waalidka ama ardayga qaan gaarka ah uu diido ubandhigida macluumaadka aqoonsiga shaqsigaa qolo sadexaad, kadib qoladaas waxay sii wadi karaan hababka dadaalka ay kudoonayaan macluumaadkay rabeen.

Ogsoonow: *Sida kucad 34 CFR §99.31 (FERPA), Utah LEAs waxaa kujira ogaysiis badqabyo hawleed sanadle ah taasoo ah siyaasadooda gudbinta diiwanada waxbarasho ee ardayda curyaamiinta ah ayadoo lahelin ogolaanshaha waalidka ama ardayga qaan gaarka ah ama ogaysiis loo dirin saraakiisha iskuul kale ama iskuulka degmada kaasoo ardaygu aadaayo ama uu rabo inuu aado.*

BADQABYO (34 CFR §300.623).

LEA kasta waa inay ilaalisaa xasaasinimada macluumaadka aqoonsiga shaqsiga ah lh ee lasoo aruurshay, lakaydiyay, lasoobandhigay, iyo xaaladah burburinta.

Hal sarkaal LEA kasta waa inuu qaataa masuuliyada xaqiijinta sirnimada macluumaadkasta oo aqoonsi shaqsi leh.

Dhamaan dadka aruurinaaya ama isticmaalaaya macluumaadka aqoonsiga shaqsiga waa inuu qaataa taba bar ama tilmaamo quseya siyaasadaha iyo hababka gobalka ee qaybtaan iyo 34 CFR §99.

LEA kasta waa inay ilaalisaa, si dadwaynuhu u arkaan, liiska magacyada dadka hada kashaqeya iyo shaqooyinka ay qabtaan shaqaalahaas LEA dhecdeeda kuwaasoo gali kara macluumaadka aqoonsiga shaqsigaa leh ee ardayda curyaamiinta ah leh.

BAABI'INTA MACLUUMAADKA (34 CFR §300.624).

LEA waa inay wargalisaa waalidka ama ardayga qaan gaarka ah marka macluumaadka aqoonsiga shaqsigaa leh la aruurinaayo, la ilaalinaayo ama loo adeegsanaayo IDEA iyo USBE xeerarka waxbarashadooda gaarka ah looma baahna hada si ardayga adeegyo waxbarasho loo siiyo ardayga.

Macluumaadka aan loobaahnayn waa in latirtiraa ayadoo laraacaayo codsiga waalidka ama ardayga qaan gaarka ah. Sikastaba ha noqotee, diiwaanka waalidka ee magaca ardayga, ciwaankiisa, nambarka teleefankiisa, fasalka uu dhigto, diiwaanka xaadirinta, heerka fasal ee uu dhameeyay, iyo sanadka uu dhameeyay ayaa la haysan karaa ayadoon la xadidin.

Diiwaanada arday kasta waxaa loo aqoonsanaraa "mid aan loosii baahnayn si adeeg waxbarasho loosiiyo" sadex sano kadibna waa la baabi'in karaa marka aedaygu qalin jabiyo ama sadex sano kadib marka uu ardaygu 22 kugaaro IDEA. Adeega caafimaadka wuxuu ubaahanyahay in diiwaankiisa lahayo ugu yaraan sadex sano kadib bixinta adeegyada.

WAREEGIDA XUQUUQDA WAALIDNIMO DA'DA QAANGAARKA (34 CFR §300.520).

Marka arday curyaan ah uu gaaro da'da qaan gaarnimada ee sharciga Gobalka (tusale. da'da 18) tasoo ardada dhan qusayysa (marka laga reebo ardayga curyaanka ah kaasoo la go'aanshay inuusan waafaayn xeerka Gbalka) ama ardayga curyaanka ah uu guursado ama uu noqdo mid xor ah:

1. LEA waa inay bixisaa ogaysiis kasta oo IDEA ay ubaahantahay ee waalidiinta iyo shaqsiga intaba;
2. Iyo dhamaan xuquuqda ay leeyihiin waalidiinta ee badalida ardayga ee IDEA;
3. Dhamaan xuquuqda waalidiinta ee badalida ardayga ee IDEA kaasoo loo aqoonsaday qaangaar ama caruur, xeerka sixitaanka ee Gobalka ama maxaliga ah;
4. Markasta oo xuquuqaha badalida ee Gobalku, LEA waa inay ogaysiisaa shaqsiga iyo waalidiinta badalida xuquuqaha waqti macquul ah gudihiis.

XUQUUQDA ARDAYGA (34 CFR §300.625).

Xuquuqda shaqsiga ah ee waalidka lasiiyay waxaa lagu wareejiyaa ardayga gaara da'da 18 tasoo ah in ardayga aan lashaacin inuusan taam ahayn maxkamadna ay go aamiso ama ardaygu uu guursado ama uu xor noqdo.

Ayadoo laraacaayo xeerarka FERPA ee CFR §99.5(a), xuquuqda waalidka ee qusaysa diiwaanada waxbarashada waxaa loo gudbiyaa ardayga jira da'da 18 taasoo ah inaan lasheegin in ardaygu uusan tamaam ahayn maxkamaduna ay goaamiso ama ardaygu uu guursado ama uu xor noqdo.

Maxaa yeelay xuquuqda shaqsiga ah ee waalidka kujira IDEA lasiiyay waxaa lagu wareejiyaa ardayga gaara da'da 18 tasoo ah in ardayga aan lashaacin inuusan taam ahayn maxkamadna ay go aamiso ama ardaygu uu guursado ama uu xor noqdo, xuquuqaha laxiriira diiwaanada waxbarashada waa in sidoo kale ardayga lagu wareejiyaa. Hase ahaatee, LEA waa inay bixisaa ogaysiis kasto oo laga doonaayo qaybta 615 ee IDEA ardaygana ay siiso iyo waalidka.

HABABKA CABASHADA EE GOBALKA

HABABKA CABASHADA EE GOBALKA (34 CFR §300.151 AND 53A-15-305).

Guud

Sharciga Utah wuxuu u arkaa inay tahay maslaxada ugu wanaagsan ee ardayda curyaamiinta ah si loo siiyo xal degdeg ah oo cadaalad ah ee khilaafaadka kuwaasoo kadhalan kara barnaamijyada waxbarasho iyo xuquuqaha iyo masuuliyadaha ardayda curyaaminta ah, waalidiintooda, iyo iskuulada dadwaynaha (53A-15-305(1)).

USBE waxay keentay habab ay kuxalinayso cabasho kasta ee kujirtaa IDEA ayna kujirto cabashada urur ahaan ama shaqsi ahaan loo gudbiyay ee gobal kale kayimid. Faylka waa in lalasaxiixaa iskuduwaha USBE ee Gobalka ee waxbarashada gaarka ah si shaqsi ah, ayadoo la istimaalaayo mailka Maraykanka, ama fax, laguna daro magaca iskuwaha iskuulka degmada ama iskuulka gaarka ah kaasoo xadgudubku kadhacay. Qolada cabashada gudbinaysa waa inay sidoo kale nuqul udiraan LEA ama wakaalad guud. Hadii waalid ama ardayga qaan gaarka ay awoodi waayaan inay faylka qoraan, waxay laxiriiri karaan Iskuduwaha LEA ama USBE ee waxbarashada gaarka ah ee Gobalka si loo caawiyo.

Marka lahelo cabasho gobalka ah oo qoran ee IDEA ayna helaan ama Iskuduwaha LEA ama USBE ee waxbarashada gaarka ah, qolada heklaysa waa inay wargalisaa wakaalada kale hal maalin gudaheed, si loo xaqiijiyo isku xirnaanta iyo in nuqulada labada dhinacba ay helaan. Cabashada gobalka waqtigeedu wuxuu bilaabanayaa marka labada dhinacba ay helaan nuqulada.

Daawooyinka Diidmada Adeegyada Saxda ah

Xalinta cbashada taasoo la arkay in lagu guuldaraysta bixinta adeegyo quman, USBE waa inay wax kaqabataa:

1. Sidii loo xalin lahaa diidmada adeegyadaan, ayna kujiraan, sida saxda ah, lacag ucelinta ama ficilada kale ee sixitaanka ah ee kuquman baahiyaha ardayga.
2. Bixinta saxda ah ee mustaqbalka ee adeegyada dhamaan ardayda curyaamiinta ah.

HABABKA CABASHADA UGU YAR EE GOBALKA 34 CFR §300.152).

Xkamaynta iyo balaarinta; Hababka Ugu yar; Fulinta

Isduwaha gobalaka ee waxbarashada gaarka ah ee USBE waxuu cabashada kuxalinaayaa 60 maalmood gudahood marka laga reebo arimo gaar ah oo jira. Balaarinta waqtiga madhaafi karo toban maalmood. Hadii kordhintu ay qasab tahay, cabashada iyo LEA ama wakaalada dawlada ayaa loo sheegayaa, qoraal ahaan, ayna ogaysiinayso USBE qaybta waxbarashada gaarka ah. Waqtiga inta lagu jiro, Iskuduwada USBE ee gobalka ee waxbarashada gaarka ah ayaa:

1. Qaadaaya baarinta xarunta ah oo madax banaan, hadii iskuduwaha USBE ee gobalka ee waxbarashada gaarka ah ayaa go'aan kagaara in baaritaanka noocaan ah uu muhiim yahay.
2. U ogoloow cabtaha fursad dheeri ah oo uu macluumaad dheeri ah klubixiyo, ama qoraal ahaan ama cod ahaan, taasoo quseeysa eedaymaha cabashada ujira.
3. Arka dhamaan macluumaadka uuna go'aana ka gaaro in LEA ay kuxadgudubtay Xeerarka Waxbarashada Gaarka ah ee IDEA iyo USBE.

4. Uusoo saaro go'aan qoraal ah cabtaha, ayna lasocoto nuqul loodiray iskuduwaha LEA ee Waxbarashada Gaarka ah iyo kormeeraha degmada ama maamulaha iskuulka gaarka, kaasoo wax ka qabta edayn kasta oo cabshada kujirta kana kooban:
    a. Baarista xaqiiqada ama dhamaytiryada, iyo
    b. Sababaha keenay go'aanka kama danbaystaa ee USBE.
5. Ogolaansho usiiyo kordhinta waqtiga ee xeerka IV.G.4.a ee USBE SER kaliya hadii:
    a. Arimo gaar ah ay jiraan ayadoo loofiirinaayo cabtaha ama
    b. Waalidka, ardayga qaangaarka ah, iyo LEA da kulugleh ay kuheshiiyaan si waqtiga loo kordhiyo si wada hadal loo galo, ama la sameeyo qaababka kale ee xalinta khilaafaadka ee Gobalka lahelo.
6. Go'aaminta hababka dhaqangalinta dhabta ah ee goaanka ugu danbeeya ee USBE, hadii loo baahdo, ayna kamid yihiin caawimaada dhanka farsamada ah, wada hadalada, iyo talaabooyinka sixitaanka si heshiis loo gaaro.

Go'aanka Ugu danbeeya

Go'aanka cabashada ee ay soo saartay USBE waa ficilka ugu danbeeya racfaana lagama qaadan karo. Hadii mid kamida dhinacyada uu diido go'aanka, Daawadooda waa inay furaan dacwad hor leh taaso ah in qolada carootay ay xaq uleeyihiin inay dacwad horleh furaan oo qusaysa arinta ay diideen.

GUDBINTA DACWAD GOBALEED (34 CFR §300.153).

Cabashada waa inay kujirtaa kuwaan soosocda:

1. Qoraal muujinaaya in LEA ama wakaalad dawlada ah ay ku xad gudubtay shuruudaha Xeerarka Waxbarashada gaarka ah ee IDEA ama USBE.
2. Xaqiiqooyinka lagu saleeyay qoraalka.
3. Saxiixa iyo meesha lagala xiriiraayo cabtaha.
4. Hadii arday gaar ah lagu xad gudbay:
    a. Magaca iyo ciwaanka uu daganyahay ardayga;
    b. Magaca iskuulka uu ardaygu dhigto;
    c. Hadii uuyahay arday aan guri lahayn, meesha ardayga llagalasoo xariiri karo iyo iskuulka ardaygu uu dhigto;
    d. Qeexida dabiicada cilada ardayga haysta, ayna lasocdaan cadaymo laxiriira cilada; iyo,
    e. Iyo qorshaha xalinta cilada taaso uu garanaayo cabtuhu marka uu cabashada keeno, sida lagu qeexay xeerka IV.E.1 ee USBE SER.

Cabashadu waa inay kusaabsan tahay xadgudub dhacay kahor waxaan hal sano kabadnayn kahor intaan dacwada lagudbin.

Majiraa wax kamida xuduudaha hawsha cabasho gudbinta gobalka ah oo yaraynaaya awooda LEA oo ah inay iskydaydo inay xadgudubka lasheegay xaliso ayadoo lafadhiisnaysa cabtaha si toos ah; hase yeeshee, Gobalku wuxuu sii wadayaa inuu kushaqeeyo cabashada lasoo gudbiyay ilaa waxbixin lakeeno ama cabashada laga noqdo.

Cabashooyina Gobalka iyo Dhagaysiyada Socda

Hadii Cabasho qoran oo gobalka ah lahelo taasi waa sidoo kale mawduuca dhagaysiga socda ee hababka dacwooyinka socda, ama ay kakoobantahay arimo badan taaso hal ama kabadan oo qaybood ee dhagaysigaas, USBE waa inay dhinac iska dhigtaa qayb kasta oo cabashada kamida taasoo laxaliyay intii dhagaysigu socda ilaa laga gaaro go'aan kama danbays ah.

Arinkasta taasoo aan qayb ka ahayn dhagaysiga socda waa in laxaliyaa ayadoo la adeegsanaayo waqtiga la xadiday iyo hababka cabashada ee qaybtaan lagu qeexay.

Hadii arin lagu sheego cabasho lagudbiyay oo qaybtaan ah taasoo horay go'aan looga gaaray dhagaysia socda qusaysana iska qolyaha, go'aanka dhagaysigu wuuu kuxiranyahay arintaas. USBE waa inay wargalisaa labada qolaba xaqiiqadaan. Dacwad u eedaynaysa LEA inay ku guuldaraysatay dhaqan galinta go'aanka hawsha socota, hase yeeshee, waa in sio toos ah loogu dhiibaa Iskuduwaha USBE ee gobalka ee waxbarashada gaarka ah iyo in ay xaliso USBE.

Waalidinta ama ardayda qaan gaarka ah ama cidii kale ee danaynaysa, ayna kamid yihiin xarumaha tababarka waalidka, xarumaha nolosha madaxa banaan, wakaaladaha difaaca iyo doodoida, ururada xirfadleeyda,iyo haydaha kale ee quman, waa in lagu wargaliyaa hababkaan intay socdaan.

1. Ogaysiiska Badqabyo hawleedka ay bixiso LEA
2. Soo bandhigida ama dhacdooyinka kale ee tababarada ay samayso shaqaalaha USBE ee laga samaynaayo Gobalkoo dhan.

HABABKA DACWOOYINKA FURAN

GUDBINTA DACWAD FURAN (34 CFR §300.507 AND 53A-15-305).

Guud

Sharciga Utah wuxuu u arkaa inay tahay maslaxada ugu wanaagsan ee ardayda curyaamiinta ah si loo siiyo xal degdeg ah oo cadaalad ah ee khilaafaadka kuwaasoo kadhalan kara barnaamijyada waxbarasho iyo xuquuqaha iyo masuuliyadaha ardayda curyaaminta ah, waalidiintooda, iyo iskuulada dadwaynaha (53A-15-305(1)).

Kahor intaan la dalbin dhagaysi ama sii wadida dacwada, qolyaha kumuran san qaybta waa inay sameeyaan dadaal imaan leh si ay uxaliyaan khilaafka si aan toos ahayn kuna xaliyaan iskuulka. Hadaan muranka laxalin, qolo ayaa codsan karta furida dhagaysi 53A-15-305(4)).

Dcwada lafuray waa inay ku edaysaa xadgudub dhacay wa aan kabadnayn kahor labo sano taariikhda waalidka ama ardayga qaangaarka ama LEA ay ogtahay ama ay ogaan kartay danbiga lagalay kaasoo abuuraaya aasaaska dacwada furan, marka laga reebo hadii waalidka ama ardayga qaan gaarka laga hor istaagay inuu dacwada cabashada furto sababo la xariira been ay LEA sheegtay oo ah inay xalisay cilada taasoo abuuraysa aasaaska dacwada; ama LEA ay qarsatay macluumaad waalidka ama ardayga kayimid kaasoo ahayd ayadoo laraacaayo IDEA in waalidka lasiiyo.

Udoodidyada iyo matalaada sharciga ah

Shaqsiyaadka Khibrada shaqsigaa uleh, ayna kujiraan udoodayaasha, waxay caawin karaa ama lashaqayn karaa labada dhinac midkood ee dacwada socota. Qaybaha waxay:

1. In uu matalo xeer ilaaliye loogu talagalay iuu fuliyo sharciga ee goobalka Utah, ama
2. Ay ayagu ismatalaan, oo sidookale loo yaqaan ismatalayaasha (Xeerarka Utah ee baarka 14-102-111, 14-802(c)(8)).

Macluumaadka Waalidka

LEA waa inay wargalisaa waalidka ama ardayga qaan gaarka ah ee sharci kasta oo bilaash ah am qarash yar iyo adeegyada kale ee laga heli karo aaga hadii waalidka ama ardayga qaan gaarka ah uu codsado macluumaadka; ama waalidka ama ardayga qaan gaarka ahi ama LEA uu codsado gadhaysi qaybtaan ah.

DACWADA FURAN (34 CFR §300.508).

Guud

LEA waa inay haysataa habab kuwaasoo ubaahan in qaybah midkood, ama xeer ilaaliye matalaaya qolo, si uu usiiyo qolada kale cabasho dacwad furan (taaso ah inay xafidsanaato). Qolada gudbinaysa cabashada waa ina nuqul kamida dacwada ugudbisaa Iskduwaha Waxbarashada Gaarka ah ee USBE ee gobalka si shaqsi ah, mailka Maraykanka, ama fax ahaan. Marka lahelo cabashada furan uuna helo Iskuduwaha LEA ama USBE ee waxbarashada gaarka ah, qolada heklaysa waa inay wargalisaa wakaalada kale hal maalin gudaheed, si loo xaqiijiyo waqtyaynta haesha.

Mawduuca Cabashada

Cabashada furan waa inay kujirtaa:

1. Magaca ardayga.
2. Ciwaanka uu daganyahay ardaygu;
3. Magaca iskuulka uu ardaygu dhigto;
4. Marka laga hadlo ardaga aan guriga lahayn ama dhalinyarada ah (marka loo fiirsho macnaha qaybta 725(2) ee sharciga caawinta kuwa aan guryaha lahayn ee McKinney-Vento (42 U.S.C. §11434a(2)), macluumaadka lagala xariiro ardayga, iyo magaca iskuulka uu dhigto;
5. Qeexida dabiicada cilada ardayga haysta, kuna xeeran samaynata iyo diidmada ee abuurida ama badalida, ayna kujiraan xaqiiqooyinka laxiriira cilada; iyo
6. Xalka lasoo jeediyay ee cilada ee qaabka uu yaqaano uuna heli karo shaqsiga markasta.

Ogaysiiska loo Baahanyahay Kahor Intaan ladhagaysan Dacwada socota

Qolo malahaan karto dhagaysiga dacwada socota ilaa ay qoladu, ama xeer iklaaliyaha matalaaya qolada, uu soo gudbiyo dacwada hawsha socota taasoo buuxinaysa shuruudaha kor kuqoran.

Kufilnaanta Dacwada

Dacwada furan ee qaybtaan looga baahanyahay waa inay ahaato mid iskufilan ilaa qolada helaysa dacwada furan ay ogaysiiso sarkaalka dhagaysiga iyo qolada kalaba qoraal ahaan, 15 maalmood gudahood ee marka lahelay dacwada, oo ah in qolada loodiray ay aaminsantahay dacwada furan inaysan buuxin shuruudihii laga rabay.

Inta lagu jiro maalmihii laagu talaglay ee wargalinta, sarkaalka dhagaysiga waa inuu go'aamiyaa horta dacwada furan in dacwadaan furan ay buuxisay shuruudihii, waana inay si degdeg ah uwargalisaa dhanacyada go'aanka oo qoraal ah.

Waxkabadalida Dacwada

Qolo waxay wax kabadali karaan dacwadooda socota kaliya hadii:
1. Qolada kale ay oglaato qoraal ahaan waxkabadalka lana siiyay jaanis ay kuxaliso hawsha shir kala saarid ah; ama
2. Sarkaalka dhagaysiga uu fasaxo, marka laga reebo in sarkaalka dhagaysiga uu kaliya fasax siinkaro in wax laga badalo waqti kasta aan kabadnayn shan maalmood kahor intaan dhagaysigu bilaaban.

Hadii qolo ay gudbiso cabasho furan wax kabadalkeeda, waqtiga kulanka xalinta iyo waqtiga lagu xalinkaro dacwada waxay mar labaad gudbinaysaa dacwad furan oo wax laga badalay.

Jawaabta LEA eeDacwad furan

Hadii LEA aysan udirin qoraal ogaysiis hore ah waalidka ama ardayga qaan gaarka ah ee qusaysa mawduuca uuu kahadlayo dacada furan ee waalidka, LEA waa inay, toban maalmood gudahood ee helida dacwada socota, udirtaa waalidka ama ardayga qaan gaarka ah jawaab ay kamid yihiin:
1. Sharaxaad ah sababta ay LEA udonayso ama udiidayso inay falkaan fuliso kaasoo lagu xusay dacwada furan;
2. Qeexida dookhyada kale ee kooxda IEP ay tixgalisay iyo sababaha kale dookyadaas loo diiday;
3. Qeexida qiimaynta hawl kasta, qiimaynta, diiwaanka, ama warbixin ay LEA ay u adeegsatay aasaaska doonista ama diidmada falka; iyo
4. Qeexida sababaha kale kuwaasoo laxiriira falka Doonista ama diidmada LEA.

Hadii LEA aysan ogaysiis hore oo qoran ugudbin waalidka ama ardayga qaan gaarka ah taasoo qusaysa mawduuca cabashada furan ee waalidka ama ardayga qaan gaarka ah ilaa dacwada furan lakeeno,LEA wali way cdayn kartaa in dacwada furan ee waalidka ama ardayga qaan gaarka ah ay tahay mid aan dhamaystirnayn, meesha ay kuhaboontahay.

Jawaabta Qolada Kale ee Dacwada Furan

Qolada lookeenaayo dacwada furan aa inay, toban maalmood gudahood marka dacwada lakeeno, ay jawaab udiraan qolada kale taaso kahadlaysa arinta dacwada furan looga hadlaayo.

FOOMAMKA NOOCA (34 CFR §300.509).

Shaqaalaha USBE waxay sameeyeen foomam si ay waalidka ama ardayga uga caawiyaan gudbinta dacwad Gobalka ah, dacwad furan oo dhagaysi, iyo codsiga dhexdhexaadin. Foomamkaan waxaa laga helikaraa Webseetka Gudiga Waxbarashada ee Gobalka Utah http://www.schools.utah.gov. Qaybaha loogama baahna inay isticmaalaan nooca foomamka Gobalka. Waalidka ama ardayga qaan gaarka ah, wakaaladaha dawlada, iyo qolyaha kale ay isticmaali karaan nooca foomamka Gobalka oo saxda ah ama dukumiinti kale, maadaama foomka ama dukumiintiga la isticmaalay uu waafaqaayo, si sax ah, maduuca looga baahanyahay buuxinta dacad furan ama shuruuaha buuxinta dacwad Gobalka ah ama codsiga dhexdhexaadin.

DHEXDHAXAADIN (34 CFR §300.506).

Guud

LEA kasta waa inay hubisaa in hababka lasameeyay lana dhaqan galiyay si qaybaha loogu ogolaado inay xaliyaan khilaafaadka quseeya wax kasta ayadoo laraacaayo xeerarka IDEA iyo USBE ee waxbarashada gaarka ah, ayna kujiraan arimaha soo baxay kahor intaan dacwada furan la gudbin, si khilaafaadka loogu xaliyo wada hadal.

Shuruudaha

Hababka waa inay xaqiijiyaan in hawsha dhexdhexaadintu:

1. Ay bilaash tahay qayb kamida qaybaha;
2. Aan loo adeegsan in lagu duudsiyo ama lagu dayaco xuquuqda waalidka ama ardayga qaan gaarka ah uu uleeyahay dhagaysiga dacwada furan ee waalidka ama ardayga qaan gaarka ah, ama lagu duudsiyo xuquuq kasta oo ay ogolaatay IDEA iyo
3. Uuna garwadeen ka yahay dhexdhexaadiye xirfad uleh kaasoo loo tababaray hawlaha dhexdhexaadinta saamaynta leh.

LEA waxay udajin kartaa qaabab waalidiinta ama ardayda qaan gaarka ah iyo iskuulada kuwaasoo aan dooran hawsha dhexdhexaadinta fursad ay kula kulanto, iyo waqti iyo goob ay kuqancaan waalidiinta ama ardayda qaan gaarka ah,qolada aan doonayn kaasoo heshiis kula jira haayad kale oo khilaafka xalisa, ama xarun tababarida iyo macluumaadka waalidka ama xarun adeeg bulsho ee Gobalka ah;ama cid sharaxayso faaiidooyinka, ama kudhiirigalinaysa isticmaalka, hawsha dhexdhexaadinta ee waalidka ama ardayga qaangaarka ah.

Iskuduwaha USBE ee Waxbarashada Gaarka ah ee Gobalka qof loo magacaabay ilaalinta liiska ama shaqsiyaadka kuwaasoo ah dhexdhexaadiyaal xirfad uleh aqoona uleh sharciga iyo xeerarka quseeya waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada laxiriira.

Iskuduwaha USBE ee Waxbarashada Gaarka ah ee Gobalka iyo iqof loo magacaabay ayaa soo doorta dhexdhexaadiyaal si qori tuur ah, ama aasaasyo kale oo dhexdhexaad ah.

USBE ayaa bixinaysa qarashka kubaxaaya hawsha dhexdhaxaadinta, ayna kujiraan qarashaadka kulamada ee qaybta lagu qeexay.

Kulan kasta oo hawsha dhexdhexaadinta ah waa in lagu jadwaliyaa waqti macquul ah laguna qabtaa meel ay kuwada qanacsanyihiin qaybaha khilaafka.

Hadii qaybuhu ay khilaafka kuxaliyaan wada hadal, dhinacyadu waa inay saxiixaan heshiis sharci:

1. Kaasoo cadaynaaya heshiiska sheegaayana in dhamaan doodihii dhacay intii hawsha dhexdhexaadinta lagu jiray ay jihiin kuwo xafidan aana loo adeegsan karin cadayn ahaan dhagaysi dacwad kasta oo xigta ama dacwad shibil ah ee khilaaf arintaa kayimaada; iyo
2. Uu saxiixo waalidka ama ardayga qaan gaarka ah iyo qof kasocda LEA labaduba kaasoo amar uqaba inuu qabto haayad noocaan ah.

Heshiis saxiixan, oo qoran oo dhexdhexaadin ah ee cutubkaan kaasoo laga fulin karo maxkamad kasta oo gobalka ah taasoo waafaqsan xeer maxkamadaha ama maxkad degmo oo maraykanka ah.

Doodaha dhacay intii hawsha dhexdhexaadinta waa inay xifidnaadaan loomana isticmaali karo cayn ahaan dacwad dhagaysi oo kasta oo furan oo xigta ama dacwad kasta oo shibil ama maxkamad kasta oo Gobal ama mid Federalka ah.

Dhexdhaxaadnimada dhexdhaxaadiyah

Qofka dhexdhexdaadiyaha ah.

1. Waa inuusan ahayn shaqaale USBE am LEA taasoo kuleg leh waxbarashada ama xanaanayta ardayga; iyo
2. Waa inuusan lahayn dano shaqsi ama shaqo taasoo xadgudub ku ah dhexdhexadnimada qofka.

Qofka dhanka kale uqalma inuu noqdo dhexdhexaadiye ma aha shaqaale LEA ama USBE gabi ahaanba waayo waxaa lacagsiiyay wakaalad si uu dhexdhexaadiye unoqdo.

HABKA XALINTA (34 CFR §300.510).

Kulanka Xalinta

15 maalmoodf gudahood ee marka lakeeno ogaysiiska dacwada furan waalidka ama ardayga qaangaarka ah, iyo kahor samaynta dhagaysiga furan, LEA waa inay kuqancisa kulan ay laqaadato waalidiinta ama ardayda qaan gaarka ah iyo xubnaha ay qusayso ama xumnaha kooxda IEP kuwaasoo cilmi gaar ah u leh xaqiiqooyinka lagu qeexay dacwada furan oo ah in:

1. Ay kujirto wakiil LEA ah kaasoo haysta amar uu go'aan kugaari karo asagoo wakaalada matalaaya; iyo
2. Uusan kujiri karin xeer ilaaliye LEA kasocda ilaa waalidka ama ardayga qaan gaarka ah uu lasocdo xeer ilaaliye.

Ujeeada kulanku waa in waalidka ardayga ama ardayga qaan gaarka uu kadoodo dacwada furan, iyo xaqiiqooyinka dacwa furan ay kusalaysan tahay, sidaa awgeed LEA waxay jaanis uhelaysaa inay xaliso khilaafka aasaaska u ah dacwan furan.

Kulanka xalinta looma baahna hadii waalidku ama ardayga qaangaarka ah iyo LEA ay isku waafaqaan qoraal ahaan in kulankii laga kaaftoomay, ama waalidka ama ardayga qaan gaarka ah iyo LEA ay iskuwafaqaan inay maraan habka wada hadalka.

Waalidka iyo LEA ayaa go'aan kagaaraaya xubnaha kooxda IEP da ee kulanka kaqayb galaaya.

Waqtiga Xalinta

Hadii LEA aysan kuxalin dacwadaan furan si ay kuqanceen waalidka ama ardayga qaan gaarka ah mudo 30 maalmood gudohood ah ee marka lahelo dacwada furan, dhagaysiga dacwada furan ayaa dhici kara. Waqtiga soo sarista go'aan kama danbays ah wuxuu kabilaabanaayaa markay dhamaato udadaan 30 maalmood ah.

Marka laga reebo meesha ay dhinacyadu si wada jir ah ugu heshiiyeen in ay habka xalinta ka kaaftoomaan ama isticmaalaan habka dhexdhexaadinta, kuguuldaraysiga waalidka ee inuu dacwad furan gudbiyo si uu oga qayb galo kulanka xalinta waxay dib udhigaysaa waqtiga laqaban lahaa hawsha xalinta iyo dhagaysiga dacwada furan ilaa kulanka laqabto.

Hadii LEA ay awoodi wayso in way waalidka kulanka xalinta keento kadi markay dadaalo macquul ah laqaaday (lama dukumiintigareeyay) LEA waxay, markay dhamaato mudada 30 maalmood, ay codsato in sarkaalka dhagaysiga inuu iskatuuro dacwada furan ee waalidka. Hadii LEA ay kufashilanto inay qabato kulanka xalinta 15 maalmood gudahood ee helida ogaysiiska waalidka ama ardayga dacwada furan ama ay kuguuldaraysato inay kaqayb gasho kulanka xalinta, waalidka ama ardayga ayaa soo faragalin kara sarkaalka dhagaysiga inuu bilaabo dhagaysiga dacwada waqtigeeda.

45 ta maalmood ee dhagaysiga dacada waxay bilaabanaysaa maalin kadib marka mid kamida dhacdooyinkaa soo socda uu dhaco:

1. Labada dhinacba kuheshiiyaan in laga kaaftomo kulanka xalinta;
2. Kadib marka dhexdhexaadinta ama kulanka xalinta uu biloowdo, laakiin kahor intaysan dhamaan mudada 30ka maalmood, dhinacyadu waxay qoraal ahaan kusheegayaan in aan heshiis la gaari karin;
3. Labada dhinacba ay kuheshiiyaan qoraal ahaan inay sii wadaan dhexdhexaadinta markay dhamaato 30 maalmood ee mudada xalinta, laakiin hadhoow waalidka ama adayga qaan gaarka ah iyo LEA ay kabaxaan hasha dhexdhexaadinta.

Heshiiska dajinta Qoran

Hadii heshiis khilaafka ah lagu gaaro kulanka, dhinacyadu waa inay gaaraan heshiis sharci ah kaasoo ay saxiixaan waalidka ama ardayga qaan gaarka ah iyo akiilka LEA labaduba kaasoo amar uhaysta inuu matalo LEA kaasoo laga fulin karo maxkamad kasta oo gobalka taasoo qeerka waafaqsan ama maxkamad degmo ee Maraykanka ah.

Mudada Kormeerida Heshiiska

Hadii dhinacyadu fuliyaan heshiis, dhinac ayaa burburin kara heshiiska sadex maalmood gudahood ee fulinta heshiiska.

DHAYGAYSIGA DACWADAHA FURAN

DHAGAYSIGA DACWAD FURAN OO DHEXDHEXAAD AH (34 CFR §300.511).

Markasta oo dacwad lafuro, walidiinta ama ardayda qan gaarka ah ama LEA ee kulugleh khilaafka waa inay fursad uhelaan dhagaysi dacwadeed dhexdhexaad ah.

Iskuduwaha USBE ee Waxbarashada Gaarka ah ee Gobalka ayaa lasoconaaya dhamaan hawlaha dhagaysiga si loo xaqiijiyo inay waafaqsan yihiin hababkii loogu talagalay.

Sarkaalka Dhagaysiga dhexdhexaadka ah

Dhagaysiga dhexdhexaadka ah ee dacwada furan waxaa fulinaaya USBE. Iskuduwaha USBE ee Waxbarashada Gaarka ah ee Gobalka ama qof loo magacaabay ayaa magacaabaaya sarkaalka dhagaysiga ee dhexdhexaadka ah si qori tuur ah (wareeg ah), iyo ayadoo laraacaayo hababka USBE.

Ugu yaraan, sarkaalka dhagaysiga waa inuu:

1. Waa inuusan ahayn shaqaale USBE am LEA taasoo kuleg leh waxbarashada ama xanaanayta ardayga; ama
2. Waa inuusan lahayn dano shaqsi ama shaqo taasoo xadgudub ku ah dhexdhexadnimada qofka ee dhagaysiga;
3. Oqoon uleh, iyo awood uu kufahmo, bixinta Xeerarka IDEA iyo USBE ee Waxbarashada Gaarka ah, sharciyada Feralka iyo Gobalka ee quseeya IDEA iyo matalaadada sharci ee IDEA ayna matalayaan maxkamadaha Federalka ah ama Kuwa Gobalka;
4. Uu leeyahay aqoon iyo awood inuu qabto dhagaysiga asagoo raacaaya sida saxda ah, heerka sare ah ee kudhaqanka sharciga; iyo
5. Uu leeyahay aqoon iyo awood inuu qabto uuna kuqoro go'aanada asagoo raacaaya sida saxda ah, heerka sare ah ee kudhaqanka sharciga; iyo

Qof sidakale uqalma inuu qabto dhagaysiga maahan haba yaraatee shaqaale wakaalada ah waayo waxaa lacag siiyay wakaada iyo uu wakiil kanoqdo dhagaysiga maxkamada.

Mawduuca Dhagaysiga Socda

Dhinac codsanaaya dacwada dhagaysiga ma keeni karo arin meesha dhagaysiga dacwada kuwaasoo aan lagu xusin soo gudbinta dacwada, ilaa oo dhinaca kale aqbalo.

Waqtiga loojaan gooyay Codsiga Dhagaysiga dacwad

Waalidka ama ardayga qaan gaarka ah ama LEA waa inay codsataa dhagaysi dhexdhexaad ah ee dacwadooda furan labo sano gudahood tariikhda waalidka ama ardayga qaan gaarka ah ama LEA ay ogaatay ama ay ogayd falka eddaynta kaasoo dacwada furan ay qusayso.

Waxyaalaha kabaxsan Waqtiga lajaan gooyay

Jaan goynta waqtiga ee lagu cadeeyay IV.M.6 ma quseeyo waalidka ama ardayga qaan gaarka ah hadii waalidka ama ardayga qaan gaarka ah laga hor istaagay gudbinta dacwad furan sababoo ah:

1. Been qaaska ah ee LEA samaysay taasoo ah inay xalisay ciladii dacwadaani ay kusalaysnayd; ama
2. LEA ay kaqarisay macluumaad waalidka ama ardayga qaan gaarka ah taasoo loo baahnaa in lasiiyo waalidka ama ardayga qaan gaarka ah.

XUQUUQAHA DHAGAYSIGA (34 CFR §300.512).

Guud

Dhinac kasta oo dhagaysiga kujira ama racfaan ah wuxuu xaq uleeyahay:

1. Inuu lasocdo uuna lataliyo lataliye iyo shaqsiyaad aqpoon gaar ah uleh ama tababar uqaba dhibaatooyinka ardayga curyaanka ar haysta;
2. Uu cadayn keeno isdifaacana, isdhaafasaan baaritaanada, uu qasbo kaqaygalida marqaatiyaasha;
3. Uu xarimo soo gudbinta cadayn dhagaysiga taasoo aan dhinaca loo soo gudbin ugu yaraan shan maalmood kahor dhagaysiga;
4. Uu helo qoran ama, dookha waalidka ama ardayga qaan gaarka ah, koronto kushaqeeya, diiwaanka verbatim ee dhagaysiga; iyo
5. Uu helo qoran ama, dookha waalidka ama ardayga qaan gaarka ah, koronto ah ee natiijooyinka xaqiiqooyinka iyo go'aamada.

Soobandhiga Macluumaadka Dheeriga ah

Ugu yaraa shan maalmood kahor dhagaysiga, dhinac kasta waa inuu usoo bandhiga dhinacyada kale dhamaan qiimaynada ladhamaystiray taariikhda iyo cadaymaha lagu saleeyay qiimaynada dhinaca soo gudbinaaya taasoo dhinacu uu rabo inuu adeegsado xiliga dhagaysiga.

Sarkaalka dhagaysiga wuxuu kahor istaagi karaa dhinac kasta soo bandhigida qiimaynada iyo cadaymaha la xiriira kuwaasoo aan lasoo bandhigin ugu yaraan shan maalmood kahor dhagaysiga dacwada ayadoon dhinaca kale aqbalin.

Xuquuqaha Waalidnimo ee Dhagaysiga

Waalidka ama ardayga qaan gaarka ah ee kulug leh dhagaysiga waa in lasiiyaa xaqa ah:

1. Inuu joogo ardayga ay dacwada ladhagaysanaayo qusayso;
2. Dhagaysiga in loo furo dadwaynaha; iyo
3. Haysashada natiijooynka xaqiiqada iyo go'aanada kuwaasoo waalidka qarash kagalin.

GO'AANADA DHAGAYSIGA (34 CFR §300.513).

Go'aanka Sarkaalkaa Dhagaysiga

Go'aanka sarkaalka dhagaysiga ee hadii ardaygu helay TAPE waa in lagu saleeyaa xaqiiqopoyin jira.

Mawduucyada eedaynta kuxadgudubka habsami socodka, sarkaalka dhagaysiga wuxuu go'aanmin karaa in ardaygu uusan helin TAPE kaliya hadii dhamaystirnaanta hamsami socodku:

1. Uu carqaladeeyay xaqa ardayga ee helida TAPE;
2. Si wayn ucarqaladeeyay fursada waalidka ama ardayga ee kaqayb galka hawsha go'aan gaarista ee quseeysa bixinta TAPE ardayga lasiiyo; ama
3. Ama uu amuur ku keeno faaiidada waxbarashada.

Majiraan wax qaybtaan kujira oo la abaabuli karo si lootaageero sarkaalka dhagaysiga kana yimaada amrida LEA inay raacdo shuruudaha habsami socodka.

Codsi Kaduwan Dhagaysiga Socda

Waalidka ama ardayga qaan gaarka ah wuxuu xaq uleeyahay inuu gudbiyo dacwad kale oo furan ee arimo kaduwan kuwii dacwadii hore kujiray.

Natiijooyinka iyo Go'aanada Loo gudbiyay Gudiga Latalinta iyo Bulsho Waynta

Iskuduwaha USBE ee Waxbarashada Gaarka ah ee Gobalka, kadib marka latirtiro macluumaadkasta oo aqoon shaqsi ah leh, waa inuu:

1. Gudbiyaa natiijooyinka iyo go'aanada ee dacada furan uuna ugudbiyo Gudiga Latalinta Waxbarashada Gaarka ah ee Utah (USEAP); iyo
2. Ayna kadhigaan naiijooyinkaas iyo go'aamadaas kuwo dad waynuhu uheli karo si online ah.

KAMADANBAYSNIMADA GO'AANKA (34 CFR §300.514).

Go'aan lagu sameeyay dhagaysiga lasameeya waa kama danbays ilaa dhinaca dhagaysiga ah uu racfaan kaqaato una gudbiyo maxkamada shibilka.

HABABKA FULINTA EE GOBALKA (34 CFR §300.537).

Aan aqbalayn bixinada fulinta awaamiirta maxkamada ee heshiis lagaaray ayadoo lamaraayo dhexdhexaadin ama kulan dib uheshiisineed, majiraan wax kale oo USBE kahor istaagaaya inay adegsato hababkale si ay ufiso heshiiska, ayadoo ay cadayaayo isticmaalka hababkaan inaysan waajib ahayn ayna dib dhigayn ama duudsiyayn xuquuqda dhinacna si loo helo fulinta heshiiska qoran maxkamada Gobalka oo xaq uleh ama maxkamad degmo oo Maraykanka ah.

JAAN GOYNTA WAQTIGA IYO KUQANCINTA DHAGAYSIGA (34 CFR §300.515).

Iskuduwaha USBE ee Waxbarashada Gaarka ah ee Gobalka ama qofka lamagacaabo waa inuu xaqiijiyaan in wax kadanbeya 45 maalmood markay mudada 30 maalmood dhamaato ee xalinta, ama waqtiyada lagu daray kuwaasoo dhashay habsami usicidka xalinta.

1. Go'aan kama danbays ah ayaa lagu gaaray dhagaysiga, iyo
2. Nuqul kamida go'aanka ayaa mail ahaan loogu diray dhinacyadoo dhan.

Sarkaalka dhagaysiga wuxuu siin karaa waqti kordhin codsiga labada dhinacba.

Dhagaysi kasta iyo kormeer kasta oo quseeya muran afka ah waa in algu sameeyaa waqtiga iyo meesha ay kuqancaan waalidiinta iyo ardayda kulugta leh.

Dhagaysiyada Dacwada ee Ladadajiyay

Dhagaysiyada dacwada ee la dadajiyay waxaa codsankara waalidka ama ardayga qaan gaarka ama LEA midkood ayadoo laraacaayo tusaalayaasha soosocda (§300.532):

1. Waalid ama ardayga qaan gaar ah wuxuu diidi karaa go'aan kasto oo anshax kaasoo kadhashay meelaynta Go'aan (ayna kujiraa qaabaynta waxbarashada kale ee kumeel gaarka ah [IAES]), ama daliilka go'aaminta.
2. LEA waxay aaminsantahay ilaalinta meelaynta hada ee ardayga ayna sooraacdo habka anshaxa ee §300.530 iyo §300.531 in ay siwayn usabi karaan dhaawac ardayga ama dadkale soo gaara.

Dhagaysiga dacwada ee ladegdejiyay waa inay dhacdaa 20 maalmood gudahood ee taariikhda dacwada furan lagudbiyay (ayadoo laraacaayo shuruudaha dacwada furan ee IV.J). Sarkaalka dhagaysiga waa inuu go'aan gaaraa toban maalmood gudahood ee iskuulka kadib dhagaysiga.

Ilaa waalidka ama ardayga qaan gaarka iyo LEA ay iskuraacaan qoraal ahaan in lagakaaftoomo kulanka xalinta ama ay iskuraacaan inay isticmaalaan habka wada hadalka ee lagu qeexay §300.506, kulan xalin ah waa inuu dhacaa todobo maalmood gudahood ee marka lahelo ogaysiiska dacdawad furan, dhagasiga dawdana waa lasii wadayaa ilaa arinta laga xaliyo si ay kuwada qanacsanyihiin dhinacyadoo dhan 15 maalmood gudahood marka dacwada furan lasoo gudbiyo.

SHARCIGA MADANIGA AH (34 CFR §300.516).

Guud

Dhinac kasta oo kacarooda natiijooyinka iyo go'aanka kaasoo aan haysan xaq uu racfaan uga qaato, iyo cid kasta oo kacaraysiiyo natiijooyinka iyo go'aanku, wuxuu xaq uleeyahay inuu dacwad madani ah keeno ayadoo loo fiirinaayo ogaysiiska dacwada ee codsiga dhagaysigeeda. Dacwadaan axaa lagaynkaraa maxkamad kasta oo Gobalka ah tasoo sharciga waafaqsan, ama maxkamad degmo ee Maraykanka ah, ayadoon loo fiirinayn tirada muranka. Dacwad madani ah ayaa loo gudbin karaa midkood maxkamada federalka ee gobalka; hadii racfaan loogudbiyo (a) maxkamad gobal, racfaanka waa in algudbiyaa 30 maalmood gudahood taarikhda go'aan kagaarida dhagaysiga dacwada. Maxkamad federal ah ayaa waqti lamida uxadidkarta.

Habab Dheeri ah

Dacwad kasta oo madani ah, maxkamadu:

1. Waxay heshaa diiwaanada dacwadaha maamulka;
2. Waxay dhagaysataa cadayn dheeri ah hadii dhinac codsado; iyo
3. Ayadoo go'aankeea kusalaynaysa qaalib ahaanta cadaynta, waxay nafis siisaa in go'aanka maxkamady yahay mid sax ah.

Go'aan maxkameedka Maxkamada Degmada

Maxkamada degmada ee Maraykanka waxay sameeyaan xukuno maxkamadeed kuwaasoo laga keeno Badqabyo Hawleedka ee IDEA ayadoon loo fiirinayn tirada muranka.

Sharciga Dhismaha

Majiraan wax qaybtaan ah oo adkaynaaya xidinaanta xuquuqaha, hababka, iyo daawooyinka laheli karo dastuurka dhexdiisa, Sharciga Curyaamiinta Maraykanka ee 1990 astaantiisu tahay V ee sharciga dhaqan celinta ee 1973, ama sharciyada kale ee federalka ee difaacaaya xuquuqda ardayda curyaamiinta ah, marka laga reebo kahor intaan dacwadaan madinga ah lagudbin ee sharciyadaan laga helo aad raadiso xal kaasoo sidoo kale laga heli karo Badqabyo Hawleedka IDEA, hababka waa in lagu burburiyaa isla qaabka kaasoo loogu baahankaro in dacwada lakrrno qaybta 615 ee IDEA.

QARASHKA XEER ILAALIYAHA (34 CFR §300.517 AND 53A-15-305(7)).

Guud

Talaabo kasta ama dacwad lakeenay Badqabyo Hawleedka ee IDEA maxkamada, ikhtiyaarkeeda, waxay bixin kartaa qarashka xeer ilaaliyaha qayb kamida qarashaadka:

1. Dhinaca jira kaasoo ah waalidka ardayga curyaanka ah ama ardayga qaan gaarka ah;

2. Dhinaca jira kaasoo ah USBE ama LEA oo kasoo horjeeda xeer ilaaliyaha waalidka ama ardayga qaan gaarka ah kaasoo dacwada gudbiyay ama wax lamid ah oo ah dacad taasoo doqonimo ah, maalaayacni ah, ama aan aasaas lahayn, ama kadhan ah xeer ilaaliyaha waalidka ama ardayga qaan gaarka ah kaasoo sii wada inuu dhaarto kadib markii dhaarto ay noqotay si cad mid doqonimo ah, maalaayacni ah, ama aan aas aas lahayn;
3. Ama dhinaca USBE ama LEA oo kadhan ah xeer ilaaliyaha waalidka ama ardayga qaan gaarka ah, ama kadhan ah waalidka ama ardayga qaan gaarka ah, hadiii codsiga waalidka ama ardayga qaan gaarka ah ee dhagaysiga dacwada ama fal lamida loosoo jeediyay sifo aan sax ahayn, sida in wax lagu dhibaateeyo, in ay sababto dib udhac aan muhiim ahayn, ama si aan loobaahnay loo kordhiyo qiimaha dhaarinta.

Lacagaha ay leedahay IDEA lama isticmaali karo si loogu bixyo qarashaka xeer ilaaliyaha ama qarashaadka ee dhinac oo kulugleh wax go'aan ah ama dacwad ah. LEA ayaa isticmaasha lacagaha IDEA si ay uqabato go'aano ama dacwad quseeya Badqabyo haleedka ee IDEA.

Kudeeqida Qarashka

Maxkamad ayaa bixiso qarashaad xeer ilaaliye oo macquul ah ayna kujiraa kuwa soo socda:

1. Qarashka labixinaayo waa in lagu saleeyaa qiimayaasha bulshada kadhex jira taasoo go'aanka ama dacwado ay kakacday nooca iyo tayada adeegyada ladhigay.
2. Majiraan abaalmarin ama labajibaare ayaa la adegsadaa marka laxisaabinaayo qarashka lasiiyay.
3. Qarashaadka xeer ilaaliyaha lama bixin karo iyo qarashaadka laxiriirana lama soocelinkaro go'aan kasta ama dacwadkasta ee adeegyada lasameeyay ee kuxiga waqtiga ee dalabka laqoray ee dajinta waalidka ama ardayga qaan gaarka ah hadii:
    a. Dalabka lafuliyay inta lagu jiray waqtiga lagu qeexay xeerka 68 ee xeerarka Federalka ee dacwadaha madaniga ah ama, kiiska dacwad maamuleed ah, waqti kasta oo kabadan toban maalmood kahor intaa dacwada bilaaban;
    b. Dalab bixinta lama aqbalaayo mudo toban maalmood gudahood ah; iyo
    c. Markamada ama sarkaalka dhagaysiga ayaa helaayaa in caawimaada ay ugu danbayn heleen waalidiinta maaha mid oga fiican waalidiinta dalabka dajinta.
4. Qarashaadka xeer ilaaliyaha laguma bixinaayo wax laxiriira kulan kasta ee kooxda IEP ilaa kulan mid kayimid dacwad maamul ama xukun maxkamadeed, ama go'aanka gobalka, ee dhexdhexaadinta kujrta §300.506.
5. Kulan xalineed looga aqoonsan karo inuu yahay kulan kayimid dhagaysi la amray ama go'aan maxkamadeed; ama dhagaysi la amray ama go'aan maxkamadeed oo loo sameeyay sababo laxariira qarashaadka xeer ilaaliyah ee qaybtaan.
6. Bixinta qarashaadka xeer ilaaliyaha iyo qarashaadka kale ee laxiriira waaa bixinaaya waalidka ama ardayga qaan gaarka ah kaasoo ah dhinac kujira oo si wayn udiiday dalabka dajinta.

Maxkamada waxay yaraysaa, si qiyaasan, cadadadka qarashaadka xeer ilaaliyaha lasiiyo, hadii maxkamadu ogaato in:

1. Waalidka ama ardayga qaan gaarka ah, ama xeer ilaaliyaha waalidka ama ardayga qaan gaarkah, inta lagu jiray go'aaminta ama dacwada, ay sabab la'aan loo dheereeyay mudada xalka kama danbaysta ah ee muranka.
2. Qiimaha qarashaka xeer ilaaliyaha oo sidakale loo amray ln lasiiyo si bilaa sabab ah waxay kabadan tahay qiimaha saacadii ee bulshada laga qaado marka xeer ilaaliyuhu shaqooyin lamida tan qabanaayo ee xirfadaha macquulka ah, sumcada, iyo khibrada;

3. Waqtiga lagu bixiyay iyo adeegyada sharci ee lasameeyay aad ayay xad dhaaf u ahaayeen ayadoo lafiirinaayo dabiicada go'aanka am dacwada; ama
4. Xeer ilaaliyaha matalaaya waalidka ama ardayga qaan gaarka ah ma uuan siin LEA macluumaad sax ah ee ogaysiiska codsiga furan.

Hadii qaybuhu aysan gaarin heshiis ama qiimaha qarashka xeer ilaaliyaha aysan kaheshiin, kadib dhinaca dalbanaaya soocelinta qarashaadka xeer ilaaliyaha ee xeerka maamulida waxbarashada gaarka ah ee 20 U.S.C. §1415(i), wa inuu dacwad maxkameed gudbiyaa 30 maalmood gudahood kadib marak lasoo saro go'aan dacwad furan (53A-15-305(7)).

Shuruucda kore ee qusaysa qarashaadka xeer ilaaliyaha kam quseeyaan wax go'aan maxkameed ama dacwadeed ah hadii maxkamadu ogaato in LEA si bilaa sabab ah udheeraysay xalka ugu danbeeya gaaristisa ee go'aanka ama dacwada ama ay jirtay xadgudub kadhan ah badqayo hawleedka IDEA.

XAALADA ARDAYGA INTA DACWADA SOCOTO (34 CFR §300.518).

Inta go'aanka laga gaaraayo dacwooinka muumulka ah ama maxkamadeedka ah ee quseeya codsi dhagaysi furan, ilaa LEA ama waalidka ardayga curyaanka ah ama ardayga qaan gaarka ah ay kuheshiiyaan suda kale, ardayga dacwada kujira waa inuu sii joogaa goobtiisa wax barasho.

Hadii dacwadu qudsayso codsi kubiirid hore ee iskuul dawladeed, ardayga, asagoo wata ogolaansha waalidka ama ardayga qaan gaarka ah, waa in lageeyaa iskuul dawladeed ilaa lagasoo gabagabeeyo dhamaan dhagaysiyada.

Hadii go'aanka sarkaalka dhagaysiga dacwada furan ee ay samaysay USBE ay isku waafaqaan waalidka ardayga ama ardayga qaan gaarka ah in badalida booska ardayga ay tahay mid sax ah, meelayntaas waa in loo qaataa sida heshiis dhexmaray LEA iyo waalidka ardayga ama ardayga qaan gaarka ah.

HABABKA LOO MARO MARKA LA EDBINAAYO ARDAYDA CURYAAMIINTA AH

AWOODA SHAQAALAHA ISKUULKA (34 CFR §300.530).

Ayadoo laraacaayo shuruudaha IDEA iyo USBE ee Xeerarka Waxbarashada Gaarka ah, si lamida Xeerarka USBE ee qabanaaya, LEA kasta waa inay abuurtaa, ilaalisa, ayna dhaqan galisaa siyaasado iyo habab lagu edbinaayo ardayda curyaamiinta ah.

Kago'aan gaarista kiis-ba-kiis

Shaqalaha iskuulka waxay tixgalinayaan xaalado kasta oo gaar ah ayadoo kusalaynaaya kiis ba kiiska xiga marka ay go'aan kagaarayaan hadii badalida booska ardayga, ay tahay mid waafaqsan shuruudaha qaybtaan, ay tahay mid kuquman arday curyaan ah kaasoo kuxadgudba koodhka anshaxa ardayga.

Guud

Shaqaalaha iskuul waxay kasaari karaan ardayga curyaanka ah e kuxad gudba koodh anshaxa ardayga ayagoo ka wadaaya meesha uu hada dhigto una wareejinaaya meel kuhaboon pp waxabarahso oo kumeel gaar ah, deegaan kale, ama lacayriyo, wax aan kabadnayn toban maalmood oo iskuulka ah (si lamida hababkaan waxay qabanayaan ardayda aan curyaanka ahayn), iyo kasaarida dheeri ah oo ah waxaan kabadnayn to maalmood oo xariir ah oo maalmaha iskuulka ah isla sanadka ee dhacdooyin kala duwan ama anshax xumo, maadaama saariyadaas aysan sababi karin badalida iskuulka.

Kadib markii arday curyaan ah laga cayrsho iskuulkiisa hada mudo botan maalmood isla sanad dugsiyeedka ah, inta lagu jiro maalmaha xiga ee cayrinta LEA waa inay siisaa adeegyada loogha baahanyahay.

Awood fulin oo dheeri ah

Badalida anshax xumo ee iskuulkiisa taasoo kabadanaysa mudo toban maalmood oo xariir ah, hadii habdhaqanka taasoo keentay inuu ardaygu kuxad gudbo koodka iskuulka la ogaado inaysan muujinayn inay sabab utahay curyaanmada ardagu, shaqaalaha iskuulka waxay marin karaan hababka edbinta ee la mariyo ardada kale ee curyaamiinta ah isla qaabka iyo isla waqtiga loo mariyo hababka edbinta ardayda aan curyaanka ahayn, marka laga reebo kadib maalintatobnaad ee kasaarida iskuulka taasoo amraysa badalida booska, LEA waa inay adeegyo ufidisaa ardayga.

Adeegyada

Ardayga curyaanka ah kaaso lacayrshay booskiisi ardaynimo waa inuu:"

1. Sii wadaa inuu helo adeegyadiisa waxbarasho si loogu ogolaado ardayga inuu awooda lasocoshada manhajka guud ee waxbarashada, inkastoo meelaha kale, uuna hormar kasameeyo yoolalka loogu talagalay inuu ardaygu gaaro ee IEP; iyo
2. Uuna helo, sida saxda ah, qiimaynta dhaqdhaqaaqa habdhaqanka, iyo adeegyada habdhaqanka dareen raaca iyo isbadalada loogu talagalay in lagu xaliyo xadgudubka habdhaqan si aysan markale udhicin.

Adeegyada waxaa lagu bixin karaa qaab kale oo waxbarasho oo kumeel gaar ah (IAES).

LEA waxaa laga rabaa inay adeegyada bixiso kaliya inta lagu jiro waqtiyada cayrinta ardayga ee curyaanka ah kaasoo laga cayrshay koobtiisa waxbarasho mudo toban maamood oo iskuulka ladhigto ama kayar isla sanad dugsiyeedkaas, haday adeegyo siiso arday aan naafo ahayn sidoo kale waa lacayrshaa.

Kadib marka ardayga curyaanka ah laga cayrsho iskuulkiisa mudo toban maalmood ah ee iskuulka isla sanad dugsiyeedka, hadii cayrinta hada aysan kabadnayn toban maalmood iskuxigta oo aysan ahayn boos kabadalid, shaqaalaha iskuulka, asagoo latashanaaya ugu yaraan hal macalin oo ardayga wax udhiga, ayaa go'aamiya adeegyada loobaahanyahay, hadayba jiraan,iyo meesha adeegyada, hadayba jiraan, lagu bixinaayo. Hadii cayrintu ay tahay boos kabadalid, kooxda IEP ee ardayga ayaa go'aaminsa adeegyada saxda ah ee ardayga lasiinaayo inta uu cayrada kujiro.

MUUJINTA GOAAMINTA (34 CFR 300.530).

Toban maalmood oo iskuulka ah gudahood ee go'aan kasta oo badalaaya booska ardagayga naafada ah waayo wuxuu kuxadgudbay koodhka anshaa ardayga, LEA, waalidka ama ardayga qaan gaarka ah, iyo xubnaha ay qyusatso ee kooxda ardayda ee IEP (sida ay go'aaminyeen waalidka ama ardayga qaan gaarka ah iyo LEA) waa inuu arkaa dhamaan macluumaadka laxiriira ee kujira faylka ardayga, ayna kamid tahay IEP ga ardayga, baarintaanada macalinkasta, iyo macluumaadkasta oo quseeya kaasoo waalidka ama ardayga qaan gaarka ahi uu bixiyay si loo go'aan sado.

1. Hadii anshaxa suaasha kujira ay sababtay, ama laleeyahay xiriir muuqda oo toos ah, naafanimada ardayga; ama
2. Hadii anshaxa suaasha kujira uu yhay natiijada tooska ah ee guuldara LEA inay dhaqan galiso IEP da.

Anshaxa waa in lagu go'aamiyaa inuu noqdo astaanta naafanimada ardayga hadii LEA, waalidka, ama ardayga qaan gaarka ah, iyo xubnaha kulugta leh ee kooxda IEP ee ardayga ay go'aamiyaan in anshax xuna ay kentay ama ay xiriir toos ah oo muuqda laleedahay naafanimada ardayga ama ay ahayd natiijada tooska ah ee fashilka LEA ay kufashilantay inay dhaqan galiso IEP.

Hadii LEA, waalidka ama ardayga qaan gaarka, iyo xubnaha laxiriira ee kooxda IEP ardayga ay go'aamiyaan in anshax xumada ay ahayd natiijada tooska ah ee fashilka LEA ee ah inay dhaqan galinwayday IEP, LEA waa inay qaadaa talaabooyin degdeg ah si ay udawayso khaladaadkaas.

Go'aamonta in habdhaqanka uu ahaa astaanta naafanimada ardayga

Hadii LEA, waalidka ama ardayga qaan gaarka ah, iyo xubnaha kulugta leh ee kooxda IEP ee ardayga ay go'aamiyaan in anshaxu uu ahaa astaanta naafanimo ee ardayga, kooxda IEP waa inay:

1. Ama ay samaysaa qiimay anshaxa habdhaqanka shaqo (FBA), ilaa inay LEA samaysay qiimayn habdhaqanka shaqo kahor intaan habdhaqanka keenay boos badalida aysan dhicin, ayna dhaqan galiyaan qorshe farageilinta habdhaqanka (BIP) ee ardayga; ama
2. Hadii qorshaha faragelinta habdhaqanka horay loo dajiyay, kormar kusameeqorshaha faragelinta habdhaqanka, cusboonaysiina, sida muhiimka ah, si aad wax uga qabatohabdhanka; iyo

3. ilaa anshax xumado ay gasho qeexitaanka xeerarka xaalada gaarka ah V.E.5 ee USBE SER, kuceli ardayga meeshii markii hore lagasoo saaray , ilaa waalidka ama ardayga qaan gaarka ah iyo LEA ay isku waafaqaan in ay booska ubadalaan ayadoo qayb ka ah cusboonaysiintaqorshaha faregalinta habdhaqanka.

Xaladaha qaaska ah

Shaqaalaha iskuulku wuxuu arday kasaari karaa si kuneel gaar ah uguna wareejin karaa qaab kale oo waxbarasho wax aan kabadnayn 45 maalmood oo iskuulka ah asagoon loo fiirin in habdhaqanka laga ogaaday in ay muujinayso naafo nimada ardayga; hadii ardaygu:

1. Uu hub usoo qaato ama hub kudhex haysto iskuulka, dhismayaasha iskuulka, ama uu la aado ama uu kuhaysto shaqada iskuulka ay wado LEA;
2. Si kas ah uhaysto ama u adeegsado maandooriye, ama uu gado ama fududeeyo iibinta wax laxakameeyay, intuu iskuulka joogo, ama dhismaha iskuulka kujiro, ama uu joogo meelaha iskuulku kashaqeeyo oo ay maamusho LEA; ama
3. Uu keeno dhaawac aad uxun oo qofkale uu ugaysto intuu iskuulka joogo, dhismayaasha iskuulka, ama uu la aado ama uu kuhaysto shaqada iskuulka ay wado LEA.

Qeexitaano

Ujeedooyinka qaybtaan, qeexitaana soo socda waxay kufulayaan:

Shay laxakameeyay waxaa laga wadaa daawo ama waxkale kaasoo aan la bixin karin ayadoon dhaqtar kuu qorin, oo lagu aqoonsado jadwalada, II, III, IV, ama kujira qaybta 202(c) ee sharciga waxyaabaha laxakameeyay (21 U.S.C. §812(c)).

IMaandooriyaal waxaa laga wadaa daawo aan la ogolayn laakin kumajirto daawo sharci ahaan loo xakameeyo, loo haysankaro, ama loo isticmaali karoayadoo laraacaayo kormeerka xirfafleedyda caafimaad ee liisanka leh ama mida sharci ahaan lahaysan karo ama loo isticmaalo sharciga waxyaabaha laxakameeyo (21 USC §812).

Gaarsiin dhaawac xun waxaa laga wadaa dhaawac xun kaasoo keena halis dhimasho, xanuun xun oo jirka ah, murqo xanuun daba dheeraada, ama luminta dheer ama kala dhantaalnaanta shaqada xubinta lsida xun loo dhaawacay, ama unuga, ama qaybta maskaxda ah (18 USE §1365). Dhaawacyada aadka udaran kuma jiraan go'niinka,muruxa, bar, gubasho, murqa xanuun, jir xanuun, jiro, ama kala dhantaalnaanta shaqada xubinta dhaawaca xun uu soo gaaray, unuga ama xanuun maskaxda ah kaasoo kumeel gaar ah (21 USC §1365).

*Hub*waxaa laga wadaa hub, aalad, qalab, shay, ama walax, noole ama ma noole, kaasoo la icticmaalo ama loo adeegsan karo, in wax lagu dilo ama dhaawac xun lagaarsiiyo, marka laga reebo kan camal inuusan kujirin mindida jeebka ee afka sakiintaa leh ama kayar 2.5 inches (18 USC §930).

Ogaysiiska badqabka hawsha

Taariikhda go'aanka lagaaray si loo sameeyo cayrinta kaasoo fududaynaaya badalka booska ardayga naafada ah waayo wuxuu kuxad gudbay koodhka anshaxa ardayga, LEA waa inay wargalisaa waalidka ama ardayga qaan gaarka ah go'aankaas, ayna siiso waalidka ama ardayga qangaarka ah ogaysiiska Badqabyo Hawleedka.

BOOSK BADALIDA SABABTOO AH CAYRINTA ANSHAXEED (34 CFR §300.536).

Ujeedooyinka kasarida ardayga ee naafada ah laga saaro booska ardaynimo ee uu hada dhigmo, boos badalid ayaa lasameeyaa hadii:

1. Cayrintu ay kabadan tahay toban maalmood oo xariir ah oo iskuul maalmihiisa ah; ama
2. Arday uugalay eryidyo badan taasoo samaynaysa shax waayo:
   - **a.** Inta jeer oo lacayrshay waxay kabadan yihiin toban maalmood oo iskuulka ah sanad dugsiyedka;
   - **b.** Habdhaqanka ardayga wuxuu si muuqata ula midyahay habdhaqanka ardayga ee dhacdooyinkii hore taasoo katimid cayrino isdaba joog ah; iyo
   - **c.** Iyo sababaha dheeriga ah ee noocaan ah ee cayrin kasta, wadarta guud ee inta jeer ee ardayga lacayrshay, iyo isku qiimaynta cayrinada midba midka kale.

LEA waxay go'aamisaa ayadoo kusalanaysan kiisba kiiska xiga hadii shaxda cayrinada ay sahasho boos badalida. Go'aan kaan waa labadalikaraa si loogu eego hawsha socota ioyo dacwadah maxkamada.

KAGO'AAN GAARIDA DAJINTA (34 CFR §300.531).

Kooxda IEP ee ardayga ayaa go'aamisa dajinta waxbarashada kaduwan ee qumeel gaarka ah (IAES) hadii habdhaqanka ardayga aysan ahayn astanta naafanimada ardayga, cayrintu waxay furaysaa in booska laga badalo, ama habdhaqanku uu uu umuuqdo mid dhacaaya xaalada gaarka ah ee lagu qeexay xeerka V.E.5 ee USBE SER.

RACFAANKA UU QAATO WAALIDKA AMA LEALEA (34 CFR §300.532).

Guud

Waalidka ardayga naafada ah ama ardayga qaan gaarka kaasoo diida go'aan kasta oo quseeya meelaynta ama go'aaminta astaamaynta, ama LEA taasoo aamisan in booskiisa hada loo daayo ardayga waxaa si wayn usababi kartaa dhaawac ardayga ama dadka kale, waxay racfaan kaqaadan kartaa ayadoo buuxinaysa dhagaysiga dacwad furan.

Awooda Sarkaalka Dhagaysiga

Sarkaalka dhagaysiga dacwada furan wuxuu dhagaystaa, ama wuxuu sameeyaa go'aan quseya, racfaan. Goaan gaarista, sarkaalka dhagaysiga wuxuu:

1. Kucelinkaraa ardayga naafada ah booskii markii hore lagasoo saaray hadii sarkaalka dhagaysiga uu go'aamiyo in cayrintu ay xadgudub kutahay hababka edbinta ee Xeerarka waxbarashada gaarka ah ee IDEA ama USBE ama habdhaqanka ardaygu ay daliil utahay naafanimadiisa; ama
2. Uu amro boos badalida ardayga naafada ah deegaamayn waxbarasho kumeel gaar ah oo sax ah (IAES) wax aan kabadnayn 45 maalmood ee iskuulka hadii sarkaalka dhagaysiga uu go'aamiyo inuu ardaygu meeshiisa kunagaado waxay si muuqata u sabi kartaa dhaawac ardayga soo gaara ama dadka kale.

Hawlaha kor kuxusan waa lagu celinkaraa hadii LEA ay aaminsantahay kucelinta arga meeshii hore inay si wayn udhaaci karto ardayga ama dadka kale.

Dhagaysiga dacwada degdega ah

Markasta oo dhagaysi ladalbado ayadoo lamaraayo habka anshaxa, walidiinta ama ardayda qan gaarka ah ama LEA ee kulugleh khilaafka waa inay fursad uhelaan dhagaysi dacwadeed dhexdhexaad ah.

LEA waxay masuul katahay qaabaynta dhagaysiga dacwada degdega ah ayadoo gacan kahelaysaa Iskuduwaha USBE ee Waxbarashada Gaarka ah ee Gbalka, taaso ah inay dhacdo 2 maalmood oo iskuulka ah gudahood ee taariikhda codsiga dacwada dhagaysiga lagudbiyay. Sarkaalka dhagaysiga waa inuu go'aan gaaraa toban maalmood gudahood ee iskuulka kadib dhagaysiga.

Ilaa waalidka ama ardayga qaan gaarka ah iyo LEA ay isk waafaqaan qoraal ahaan in kulanka laga gudbo ama ay isku waafaqaan dhexdhexaadinta.

1. Kulan dib uheshiisiin ah waa inuu dhacaa todobo maalin gudahood marka ogaysiiska ee dacwada furan; iyo
2. Hawsha dacwada dhagaysiga waa lasii wadi karaa ilaa arinta laxaliyo si ay kuqancaan labada dhinacba 15 maalmood gudahood ee marka lahelo dacwada furan.

Go'aanada ee dhagaysiyada dacwada furan racfaan ayaa laga qaadan karaa.

MEELAYNTA INTA LAGU JITO RACFAANADA (34 CFR §300.533).

Marka racfaan oo dacwad furan ah uu sameeyo waalidka ama ardayga qaan gaarka ah ama LEA, ardaygu waa inuu kusii jiraa deegaamaynta waxbarasho ee kumeel gaarka ah ee sugaysa go'aanka sarkaalka dhagaysiga ama ilaa waqtigii loogu talagalay uu dhamaado, mid allr midkii soo hormara, ilaa waalidka ama ardayga qaan gaarka ah iyo SEA ama LEA ay isku waafaqan dhanka kale.

DIFAACA ARDAYDA AAN WALI XAQA UYEELAN WAXBARASHDA GAARKA AH IYO ADEEGYADA KUXEERAN (34 CFR §300.534).

Guud

Ardayga aan wali go'aan laga gaarin inuu xaq uleeyahay waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada kuxeeran ee kujira IDEA kaasoo sameeyay dhaqan kaasoo kuxadgudbay anshaxa ardayga, waxay cadayn kartaa difaacyada lagu bixiyay qaybtaan hadii LEA ay aqoon uleedahay in ardaygu uu ahaa arday naafo ah kahor intaan habdhaqanka kataagnaa talaabada anshaxa ay dhacday.

Aasaaska Waxbarashada ee Arimaha Anshaxa

LEA waa in loo arkaa in ay aqoon uleedahay in ardaygu yahay arday naafo ah hadii kahor habdhaqanka arinta anshaxa ay dhacdo:

1. Waalidka ardayga ama ardayga qaan gaarka ah uu kuqeexo dareenkiisa qoraal ahaan ayna uqoraan kormeeraha ama ama shaqaalaha maamulka ee LEA da saxda ah ama macalinka ardayga, in ardaygu ubaahanyahay waxbarasho gaar ah iyo adeegyada kuxeeran;
2. Waalidka ardayga ama ardayga qaan gaarka ah uu codsado qiimaynta ardayga; ama
3. Macalinka ardayga, ama shaqaalaha kale ee LEA uu qeexo dareemo gaar ah ee qaabka dhaqanka ee ardaygu uu muujiyay si toos ah Iskuduwaha Waxbarashada Gaarka ah ee LEA ama shaqaalaha kormeerka LEA.

Gooni ah

LEA looma aqoonsanaayo inay aqoon uleedahay hadii:

1. Waalidka ee ardayga ama ardayga qaangaarka ah:
   a. Ma ogolaan qiimaynta ardayga;
   b. Uu diiday adeeyada qaybtaan; ama
2. Ardayga laqiimeeyay loona go'aanshay inuu yahay arday aan naafo ahayn ee IDEA

Shurudaha kuwaasoo quseeya hadaysan jirin aasaas aqooneed

Hadii aan LEA aqoon ulahaynin ardaygu uu yahay arday naafo ah kahor intaysan talaabooyin anshax qaadin oo ardayga kadhan ah,ardayga lagu fulinkaraa talaabooyinka anshax ee laga qaado ardayga aan naafada ahayn kuwaasoo habdhaqankaan layimaada.

Hadii codsi qiimayn ah ladalbado ee ardayga inta lagu jiro waqtiga ardayga lagu fulinaayo talaabooyinka edbinta qiimaynta waa in lagu sameeyaa qaab degdeg ah.

Ilaa qiimaynta laga dhameeyo, ardaygu wuxuu kusii jirayaa meesha waxbarasho ee maamulka iskuulku ay go'aamiyeen, taaso ay kamid noqonkaraan Eryid ama cayrinta ayadoo wax adeega waxbarasho ah lasiinayn.

Hadii la go'aamiyo in ardayga uu yahay naafo, aydoo latixgalinaayo macluumaadka kayimid qiimaynta ay samaysay LEA iyo macluumaadka uu bixiyay waalidka ama ama ardayga qaan gaarka ah, LEA waa inay siisaa waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada kuxeeran.

GUDBINTA TALAABO LHARCI FULIN IYO MAAMULADA CALDAALADA (34 CFR §300.535).

Majiraan wax kujira IDEA oo kaxarimaaya LEA inay soo gudbiso danbiga lagalay uuna galay ardayga naafada ah ayNa ugudbiso maamulka kushaqada leh ama ay kahortagto in sharci fuliyaasha Gobalka iyo maamulka cadaalada inay qabsadaan shaqadooda ayadoo latixgalinaayo codsiga sharciga Federalka ama Gobalka ee danbiga uu ardaygu galay.

Isdhaafsiga Diiwaanada

LEA gudbinaysa danbi uu ardaygu galay ee naafada ah waa inay xaqiijisaa in nuqulada diiwaanada waxbarashada gaarka iyo edbinta ee ardayga ayaa lagud biyaa si ay hubiyaan maamulka saxda ah kuwaasoo LEA ay danbiga kuwargaliso.

LEA danbi gudbinaysa ee qaybtaan ah waxay diri kartaa nuqulo kamida diiwaanada waxabarashada gaarka ah iyo anshaxa ardayga kaliya hadii gudbinta uu ogolaado Sharciga Xuquuqda Waxbarasho ee Qoyska iyo Sirtiisa.

ARDAYDA NAAFADA AH OO AY SOO QOREEN WAALIDKOOD KANA QOREEN ISKUUL GAAR LOO LEEYAHAY MARKA FAPE AY ARINTA JOOGTO

GUUD (34 CFR §300.148).

LEA ama USBE lagama rabo inay bixiso qarashka waxbarashada, ayna kujirto adeegyada waxbarashada gaarka ah iyo kuwa laxarira, ama arday naafo ah oo oo dhigta iskuul gaar loo leeyahay ama xarun hadii LEA ama USBE ay sameeyeen TAPE udiyaarsan ardayga iyo walidka ama ardayga qaan gaarka ah loo doortay inay ardyga iskuul gaar looleyahay lageeyo ama xarun. Say ahaataba, LEA ama USBE waa inay kudaraan in ardaygu uu kamid yahay umada baahiyahooda wax laga qabtay ayadoo laraacayp xeerka VI.B ee USBE SER.

Is afgaran waaga kadhexjira waalidka ama ardayga qaan gaarka iyo LEA amaUSBE oo qusaysa barnaamij ardayga uqalma, iyo suaasha dhaqaalo celinta, waa mawduuca dacwada furan ee heer Gobal ee hababka kujira xeerarka IV.G–V of the USBE SER.

Soocelinta Meelaynta Iskuul Gaar looleeyahay

Hadii waalidka ardayga naafada ah ama ardayga qaangaarka ah, kaasoo horay uhelay waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada kuxeeran oo kasoo fulay qorista LEA ama USDB ee ardayga laga qoro iskuul gaar loo leeyahay, iskuul hoose, ama iskuul sare ayadoo ogolaansho laga helin ama aan loo gudbin LEA ama USDB si ay ugusoo celiso waaidka ama ardayga qaangaarka ah qarashka qoristaas hadii maxkamda ama sarkaalka dhagaysiga uu ogaado in LEA ama USDB aysan samayn TAPE ardygu uu helikaro waqti wanaagsan kahor intaan qoristaan laglin galinta iskulka gaarka looleeyahayna ay tahay sax. Meelaynta waalidka waxay noqon kartaa mid saxa siduu ogaaday sarkaalka dhagaysigu ama maxkamada xataa hadaysan buuxin shuruudaha Gobalka ee lamariyo waxbarashada ay bixiso USDB iyo LEA.

Xadidaada Qarash celinta

Qarasha lacelinaayo waa ladhimi karaa ama ladiidi karaa hadii:

1. Kulankii udanbeeyay ee kooxda IEP kaasoo waalidka ama ardayga qaangaarka ah uu kaqayb galay kahor intaan ardayga iskuulka dawlada laga cayrin, waalidka ama ardayga qaangaarka ah kuma wargalin kooxda IEP inay diideen meelaynta ay waday LEA ama USDB si loo siiyo FAPE ardaygooda, ayna kujirto cabirada fikirkooda iyo doonistooda inay kaqoraan ardaygooda iskuul gaar loo leeyahay ayadoo qarashaka dawladu bixinayso; ama
2. Ugu yaraan toban maalmood (ayna kujiraan fasax kasta oo oo dhacada maaln shaqo) kahor intaan ardayga iskuulka dawlada laga cayrin, waalidka ama ardayga qaan gaarka uusan siin ogaysiis qoran LEA am USDB ee macluumaadka hoos lagu qeexay ee kujira xeerka VI.C.4.a of the USBE SER;
3. Kahor intaan waalidka ama ardayga laga cayri iskuulka dawlada, LEA ama USDB waxay wargalisay waalidka ama ardayga qaan gaarka ah, ayadoo uqortay qoraal kucadahay shuruudaha layska rabo marka hore ee ujeedadeeda ah inay qiiayso ardayga (ayna kujirto qoraalka ujeedada qiimaynta taasoo ah mid quman oo macquul ah), laakiin waalidka ama ardayga qaan gaarka ah ardayga uma diyaarin in la qiimeeyo; ama
4. Marka lagaaro go'aan maxkamadeed oo qayru macquul ah ayadoo lafiirinaayo talaabooyinka uu qaady waalidka ama ardayga qaan gaark ah.

Aan kushaqayn shuruudaha waalidka ama ardayga qaan gaarka ah si uu ubixiyo ogaysiis uuna siiyo LEA ama USDB kahopr intaan ardayga lacayrin, qarashka lasoo celinaayo:

1. Waa inaad ladhimin ama ladiidin guuldarada awgeed inuu keeno ogaysiis hadii:
    a. Uu iskuulku kahor istaago waalidka ama ardayga qaan gaarka ha inuu gudbiyo ogaysiiska;
    b. Waalidka ama ardayga qaan gaarka ah mahelin ogaysiis hore oo qoran ee shuruudaha ogaysiiska ee kujira xeerarka VI.C.4.a of the USBE SER; ama
    c. Raacida shuruudaha ogaysiiska ee kuqoran xeerarka VI.C.4.a–b. of the USBE SER waxay sababi karaan waxyeelo muuqata oo ardaga gaarta; iyo
2. Waxay, go'aan gaarida iskiisa ah ee sarkaalka dhagaysiga ee maxkamada, lama dhimi karo ama looa=ma diidi karo kuguuldaraysigiisa awgeed ee keenida ogaysiiska hadii:
    a. Waaliddka ama ardayga qaan gaarka ah aysan wax aqoon ama aysan ingiriisiga qorikarin; ama
    b. Ayadoo laraacaayo xeerka VI.C.4.a–b ee USBE SER waxay sababi kartaa waxyeelo dareenka ah oo halis ah ooy ugaysato ardayga.